**DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA**

---

# BAYAANKA DIB LOO HABEEYAY EE BAYAAMINTA, QAAB-DHISMEEDKA, AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA XAFIISYADA FULINTA

Jigjiga

Nehase 2011

---

**Bayaan Tirsi 185/2011**

**<u>Bayaanka Dib Loo Habeeyay ee Bayaaminta, Qaab-Dhismeedka, Awoodaha Iyo Waajibaadka Xafiisyada Fulinta</u>**

Maadaama oo ay lagama maarmaan noqotay in dib loo habeeyo qaab-dhismeedka Xafiisyada Fulinta ee Dawladda Deegaanka Soomaalida si ay uga jawaabaan ujeedooyinka Hirgelinta Maamulka suuban iyo Isbedelka ka hanaqaaday dalka iyo deegaankaba.

Maadaama oo ay lagama maarmaan noqotay in la aasaaso qaab-dhismeed ka jawaabi kara baahida dhabta ah ee Shacabka Deegaanka iyo Ujeedooyinka Horumarineed ee Deegaanka.

Sidaas darteed, Golaha Xildhibaanada Deegaanka oo ka duulaya Qodobka 49 (3) (b) ee Dastuurka dib loo habeeyay ee Dawladda Deegaanka Soomaalida waxa uu soo saaray Bayaankan:

## QAYBTA KOOWAAD

## GUUD AHAAN

### Qodobka 1aad Ciwaan Gaaban

Bayaankan waxaa loogu yeedhi karaa "Bayaanka Dib Loo Habeeyay Ee Bayaaminta, Awoodaha Iyo Waajibaadka Xafiisyada Fulinta ee Tirsigiisu yahay: 185/2011".

### Qodobka 2aad Qeexid

Hadii aan weedhu micno kale yeelan, Bayaankan dhexdiisa:

b) **"Dastuur"** waxaa loola jeedaa Dastuurka Dib loo habeeyay ee Dawladda Deegaanka Soomaalida.

t) **"Deegaan"** waxaa loola jeedaa Deegaanka Soomaalida.

j) **"Hay'adaha kale ee Fulinta"** waxaa loola Jeedaa Xafiisyada, Wakaaladaha, Komishinada, Kuliyadaha iyo Shirkadaha iyagoo leh madax banaani sharci iyo mid xirfadeed hadana hoostaga Xafiisyada Golaha hawlfulinta ee lagu aasaasay Bayaankan.

x) Weedhaha Bayaankan dhexdiisa ee loo xeeriyay Labku waxay sidoo kale dhaqangal ku yihiin Dhedigga.

## QAYBTA LABAAD

## AASAASIDA GOLAHA HAWLFULINTA DEEGAANKA

### Qodobka 3aad Xubnaha Golaha hawlfulinta Deegaanka

Waxaa hab waafaqsan Qodobka 58 (1) ee Dastuurka loo aasaasay Golaha hawlfulinta Deegaanka oo xubnahoodu yihiin:

1. Madaxweynaha Deegaanka;
2. Madaxweyne ku xigeenka Deegaanka;
3. Madax-xafiiseedyada Xafiisyada lagu aasaasay Qodobka 4$^{aad}$ ee Bayaankan.
4. Masuuliyiinta kale ee uu Madaxweynuhu Go'aamiyo inay kamid noqdaan golaha.
5. Xafiisyada Sharciyada lagu aasaasay Xeeriyaan inay kamid noqdaan Golaha.

**Qodobka 4$^{aad}$ <u>Aasaasid</u>**

Waxaa Bayaankan lagu Aasaasay Xafiisyada Fulineed ee kala ah:

1. Xafiska Madaxweynaha.
2. Xafiiska Beeraha iyo Khayraadka Dabiiciga ah.
3. Xafiiska Khayraadka Xoolaha Iyo Horumarinta Reerguurga.
4. Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka Iyo Dhismaha.
5. Xafiiska Waxbarashada.
6. Xafiiska Caafimaadka.
7. Xafiiska Maaliyada.
8. Xafiiska Adeega Shacabka Iyo Horumarinta Cududa Shaqaalaha.
9. Xafiiska Jidadka iyo Gaadiidka.
10. Xafiiska Nabadgelyada.
11. Xeer ilaalinta guud.
12. Xafiiska Biyaha.
13. Xafiiska Tacliinta, Xirfadaha, Farsamada iyo Sayniska.
14. Xafiiska Shaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada.
15. Xafiiska Arrimaha Haweenka iyo caaruurta.
16. Xafiiska Dhaqanka iyo Dalxiiska.
17. Xafiiska Maaraynta Khatarta-Masiibooyinka.
18. Xafiiska Ganacsiga Iyo Wershadaha.
19. Xafiiska Dakhliga.
20. Xafiiska Maalgalinta iyo Qurbajoogta.
21. Xafiiska Dhalinyarada iyo Ciyaaraha.
22. Xafiiska Warfaafinta.

23. Xafiiska shidaalka, Macdanta iyo Tamarta.
24. Xafiiska Ilaalinta deegaanka, Kaymaha iyo Isbedelka Cimilada.
25. Xafiiska Waraabka Iyo Dooxooyinka.
26. Xafiiska Curinta Iyo Tiknoolojiyada.

**Qodobka 5aad Awoodaha iyo Waajibaadka Golaha hawlfulinta**

Awoodaha iyo waajibaadka golaha Hawlfulintu waxay noqonayaan sida lagu bayaamiyay Qodobka 59aad ee Dastuurka iyo shuruucda kale.

**Qodobka 6aad Awoodaha iyo Waajibaadka Madaxweynaha**

Madaxweynuhu waxa uu yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadka lagu siiya Qodobka 61aad ee Dastuurka.

**Qodobka 7aad Awoodaha iyo Waajibaadka Madaxweyne kuxigeenka**

Madaxweyne kuxigeenku waxa uu yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadka lagu siiya Qodobka 62aad ee Dastuurka.

**Qodobka 8aad Nidaamka Shirarka ee Golaha**

1. Golahu waxa uu yeelan karaa shir caadi ah iyo mid aan caadi ahayn hab waafaqsan Xeernidaameedka uu saaro Golahu.
2. Shirarka Golaha waxaa shirgudoomin madaxweynaha, hase ahaatee hadii uu maqanyahay madaxweynuhu waxaa shirgudoomin madaxweyne kuxigeenka.

**Qodobka 9aad Qaab-dhismeedka Xafiisyada**

Xafiisyada Fulintu waxay yeelanayaan qaab-dhismeedkan hoos ku xusan:-

1) Madax xafiseed uu magacaabo Madaxweynuhu kadibna ansixiyo Golaha Xildhibaanadu.
2) Ku-xigeenka Madaxa Xafiiska ama Ku-xigeeno uu Magacaabo Madaxweynuhu.
3) Geedi-socodyada shaqo iyo Shaqaalaha kale ee lagama maarmaanka ah.

**Qodobka 10aad Masuuliyad wadareedka Xubnaha Golaha**

1. Xubnaha Golaha waxaa masuuliyad Guud iyo mid gaar ahiba ka saarantahay fulinta go'aanada kasoo baxa Golaha.
2. Xubnaha Golaha waxaa masuuliyad ka saarantahay ilaalinta saacadaha Shirka, Anshaxa iyo Sirta dhamaan ajandeyaasha shirka lagu gorfeeyo faahfaahintana waxaa lagu xeerin sharci.

**Qodobka 11[aad] is hoos imaanshaha Hay'adaha kale ee Dawladda**

1. Hay'adahan waxay hoos tagayaan xafiiska madaxweynaha;
   b) Komishanka Qaabilaada Cabashooyinka.
   t) Xafiiska Isku dubaridka Horumarka wadajirka ah ee Deegaanada Somalida Iyo Oromoda.
   j) Komishinka Daraasaadka iyo Siyaasadaha.
2. Hay'adahan waxay hoos tagayaan xafiiska beeraha iyo Khayraadka Dabiiciga ah;
   b) Wakaalada iskaashatooyinka
   t) Xarunta Cilmi-baadhista Xoolo dhaqtada iyo Xoolo dhaqato beeroleyda.
3. Hay'adahan waxay hoos tagayaan Xafiiska Nabadgalayada;
   b) Komishinka Booliska.
   t) Xoogga gaarka ah.
   j) Wakaalada diwaan galinta marxaladaha Muhiimka ah.
4. Hay'adahan waxay hoos tagayaan xafiiska caafimaadka;
   b) Wakaaladda Ka hortagga iyo Xakamaynta HIV/aids
   t) Wakaalada Maamulka Iyo Dabagalka Cuntada, Dawada Iyo Adeega Caafimadka
5. Hay'adahan waxay hoos tagayaan Xeer ilaalinta guud.
   b) Komishinka Asluubta.
   t) Xarunta tababarada Xirfadleyaashas hay'adaha cadaalada.
6. Hay'adahan waxay hoostagayaan Xafiiska Tacliinta, Xirfadaha, Farsamada iyo Sayniska;
   b) Wakaaladda Xaqiijinta tayada Xirfadleyaasha.
   t) Kulliyadaha Tacliinta, Xirfadaha, Farsamada iyo Sayniska.
7. Hay'adahan waxay hoos tagayaan Xafiiska Adeega Shacabka Iyo Horumarinta Cududa Shaqaalaha.
   b) Kuliyada Adeega Shacabka Iyo Maareynta

8. Hay'adahan waxay hoos tagayaan Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka iyo dhismaha

b) Wakaalada shaqo abuurka Iyo Daamanqadka Cuntada ee Magaaaloyinka

t) Wakaalada Horumarinta iyo Maamulka Guriyaha.

9. Hay'adahan waxay hoos tagayaan Xafiiska Maaliyada;

b) Waakalada Iibka Dawladda iyo Maamulka hantida

t) Wakaalada dabagalka Shirkadaha Horumarinta Dawlada.

**Qodobka 12^aad^ Heerka is-hoos imaanshaha Ee Hay'adaha kale ee Dawladda**

1. Heerka is hoos imaanshaha iyo xidhiidhka wadashaqeyneed ee Hay'adaha lagu sheegay Qodobka 11^aad^ ee Bayaankan waxaa lagu xeerin Sharci.
2. Hay'adaha lagu xeeriyay Qdobhoosaadyadaa (1) j, (3) t iyo j, (5) b iyo t, (8) b iyo t, iyo (9) b iyo t, ee Qodobka 11^aad^ ee Bayaankan awoodaha iyo waajibaadka ay yeelanayaan waxaa lagu xeerin Sharci.
3. iyada oo ay sideeda tahay arrimaha lagu xeeriyay Qodob hoosaadka (2) ee Qodobkan, sharciyadii lagu aasaasay Wakaaladaha, Komishinada, Kuliyadaha iyo Xafiisyada lagu xeeriyay Qodobka 11^aad^ ee Bayaankan waxay ahaanayaan dhaqangal hadii aanay kahor imanayn Qodobada Bayaankan.

## QAYBTA SADDEXAAD

## Xilka iyo Waajibaadka Xafiisyada Fulinta

**Qodobka 13^aad^ Xilka iyo Waajibaadka Xafiska Madaxweynaha**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha Xafiiska lagu siiyay qodobka 63^aad^ ee Dastuurka iyo Sharciyada kale, Xafiiska Madaxweynahu wuxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Wuxuu adeeg guud oo maamul siiyaa madaxwaynaha iyo golaha hawlfulinta. Sidoo kalena in xaqiijiya in loo dhamaystiray cuduuda shaqaale iyo agab ee arrintani loogu baahan yahay.
2. Wuxuu fuliya islamarkaana la socda shaqooyinka la xidhiidha arrimaha kabineega.
3. Wuxuu madaxwaynaha, madaxwayne ku xigeenka iyo masuuliyiinta kale ee deegaanka u siiya adeega hab maamus ee ay mudan yihiin.

4. Wuxuu isku dubaarida islamarkaana habeeyaa goobaha shirarka ee loogu baahan yahay shirarka caadiga ah iyo kuwa deg-dega ah ee xubnaha Golaha hawlfulinta. Wuxuuna u dhamaystiraa qalabka iyo waxyaabaha muqaadiska ah in loo hawlgaliyo islamarkaana wuxuu u fidiya adeega soo dhaweeyn eeku haboon.
5. Wuxuu dabagala islamarkaana xaqiijiya in deegaanka si haboon looga hirgaliyay shuruucda iyo go'aanada ay soo saran golaha xildhibaanada deegaanka iyo dawladda federaalku.
6. Wuxuu suuragaliya in hadal-qoraaleedka golaha hawlfulinta iyo dhokumeentiyada kale ee golaha in xilliga ku haboon la diyaariyo, la saxeexo islamakaana dhab ahaantooda inta la hubiyo ayaa la diiwaangalin si haboonna loo xafidii.
7. Wuxuu go'naada iyo amarada uu gaadho goluhu u gudbiyaa hay'addaha ay khuseyso in ay fuliyaan ama suuragalinta fulintoodu.
8. Wuxuu qaabiila islamarkaana badhitaan ku saameeyaa si xal deg-deg ah looga gaadho cabaashooyinka u baahan xal maamul ee loo soo gudbiyo xafiiska ama marka ay arrintu tahay mid uusan xalin Karin, wuxuu isagoo raacinaya talo-bixintiisa u gudbiyaa hay'adda cabaashadu ka dhanka tahay ama masuulka hay'adda dawladdeed ee arrintu khuseyso.
9. wuxuu dajiyaa islamarkaana ku hawlgala nidaam hufan oo cadaali ah oo lagu haggo hanaanka qabilaada iyo soo gudbinta cabaashooyinka dadwaynaha, wuxuuna abuura xeelado iyo farsamooyin kala duwan oo loo adeegayaasha lagula socodsiiyo nidaamkani,
10. Wuxuu darsaa isagoo ka duulaya nooca, culayska iyo sababaha keena cabaashooyinka ay bulshadu ku dalbanayaan xal maamul ayuu natiijada daraasadeed oo wadata qaabka iyo jihooyinka xalka u ah u gudbiya madaxwaynaha.
11. Wuxuu isku dubarida islamarkaana xidhiidhiyaa xidhiidhyada dawliga ah ee deegaanku la wadaago dawladda federaalka, deegaanada dariska ah iyo deegaanada kale ee dhigiisa ah, sidoo kale dabagalaa hawlaha iskaashiga horumaarineed ee dhexmara xafiisyada iyo hay'addaha kala duwan iyo magaalooyinka kale ee calaamiga ah.
12. Wuxuu Xubnaha golaha iyo Qaybaha xafiiska maamulka u fidiya adeegyada maktabadeed, Cilmi-baadhis iyo darasadeed, macluumaad iyo dhokumanteeshin;
13. Wuxuu magaca golaha hawlfulinta ku soo dhaweeyaa islamarkaana ku qaabila marti-sharafta deegaanka uga timaada heer qaran ama heer calaami.

14. Si loo kobciyo muqaalka deegaanka iyo ka qaybgalka bulshada ee dhinacyada horumarka iyo maamulka suuban wuxuu suuragaliyaa in wakhtiga ku haboon lagu meelmariyo dood-cilmiyeedyada, fagaarayasha wadataashiga iyo shirarka kale ee dawladdu qabato.
15. Wuxuu fududeeya xidhiidhka shaqo ee hay'addaha fulineed ee madaxwaynaha hoostaga ee ay la yeelanayan madaxwaynaha.
16. Wuxuu hogaamiyaa hawlaha tageero iyo dabagal ee shaqooyinka qaab-dhismeedka maamul ee ka jira jaran-jarooyinka hoose ee Deegaanka.
17. Wuxuu qabta hawlaha kale ee uu madaxwaynuhu u xilsaaro.
18. Waa mulkiile hanti, wuxuu hab wafaaqsan sharciga ku galaa heshiisyo, wuxuu ku dacwayn karaa magaciisa laguna dacweyn karaa.

**Qodobka 14[aad] Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Beeraha iyo Khayraadka Dabiiciga ah**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha Xafiiska lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Beerahaha iyo khayraadka Dabiiciga ah wuxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Isaga oo kaduulaya sharciyada, siyaasadaha iyo istaraatiijiyada horumarinta beeraha iyo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka waxa uu diyaariyaa sharciyada, siyaasadaha iyo istiraatiijiyadaha heer deegaan ee la xidhiidha beeraha, shaqo abuurka miyiga, habsami u isticmaalka dhulka miyiga ah iyo kheyraadka dabiiciga ah, marka la ansixiyo ayuu dhaqan galiyaa.
2. Waxaa uu diyaariyaa siyaasadaha ku wajahan wax-soosaarka beeraha iyo kheyraadka dabiicigaah ee deegaanka, waxaa uu diyaariyaa gashiyada kala duwan ee loobaahan yahay sidoo kale waxa uu suuq ku haboon u raadiyaa wax-soosaarka beeraha iyo kheyraadka dabiiciga ah.
3. Waxa uu hogaamiyaa islamarkaana hagaa wakaaladaha xafiiska hoos yimaada, isaga oo hubinaya qorshahooda shaqo, miisaaniyadahoodana ugudbinayaa Golaha hawlfulinta, marka la ansixiyana waxa uu xaqiijiyaa ka midho dhalinta qorshayaashooda shaqo.
4. Waxa uu suura galiyaa in deegaanka lagu fidiyo ka faa'iideysiga beeraha, waxsoosaarka dalaga iyo kheyraadka dabiiciga ah. Islamarkaana xaqiijiyaa in wacyigalin, Maalgalin iyo taageeraba lasiiyo beeraleyda iyo xoolo dhaqato beeraleyda si loodhimo saboolnimada korna loogu qaado hab nololeedkooda.

5. Waxa uu maamulaa, hogaamiyaa, iskuna xidhaa barnaamijyada iyo masahariicaha lagu gaadhayo isku filnaanshaha damaanad qaadka cunnada ee laga fulinayo goobaha miyiga.
6. Waxa uu aas-aasaa, hogaamiyaa isla markaana dhiirigaliyaa xarumaha cilmibaadhista beeraha iyo kheyraadka dabiiciga, xarumaha tababrka beeraleyda (FTC), sheybaarada carada iyo dalaga. Sidoo kalana waxa uu tababaraa isla markaana howlgaliyaa xirfadlayaasha beeraha iyo kheyraadka dabiiciga ah.
7. Isaga oo kaashanaya cida ay khuseyso iskuna xidhaya wuxuu xaqiijiyaa in beeraleyda ku hawlan wax-soosaarka beeraha ay helaan deymo wax katari kara horumarinta beeraha iyo kheyraadka dabiiciga ah.
8. Waxa uu daraasaad ku sameeyaa hababka lagu kobcin karo waxsoosaarka dalaga iyo kheyraadka dabiiciga ah, wuxuuna talooyin iyo taageeraba siiyaa beeraleyda iyo xoolo dhaqata beeralayda sidii ay u kordhin lahaayeen waxsoosaarka beeraha.
9. Waxa uu taakuleyn siiyaa hantiilayaasha gaarka ah ee ku hawlan maalgalinta beeraha, dalaga iyo ka faa'iideysiga kheyraadka dabiiciga ah.
10. Waxa uu dabagal iyo lasocod kusameynayaaa xaaladaha caqabadaha ku noqon kara horumarinta beeraha, waxuuna fidinayaa nidaamka digniinta hore iyo udiyaargarowga isaga oo lakaasahnaya hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dowliga ahaynba.
11. Wuxuu qaadaa talaabooyinka kahortaga iyo xakameynta cudurada, cayayaanada iyo haramaha dalagyada waxyeelada uleh.
12. Waxa uu suura galiyaa, dabagal iyo lasocodna kusameeyaa xaalada ku haboon siidi waxsoosarka beeruhu unoqon lahaa mid kajawaaba baahida iyo nooca cunno ee looga baahan yahay Deegaanka iyo dalkaba.
13. Waxa uu xaqiijiyaa in xidhmooyinka horumarineed ee horumarinta haweenka iyo dhalinyarada beeraleyda ah ay waafaqsantahay Siyaada horumarinta Haweenka iyo dhalinyarada ee Deegaanka.
14. Wuxuu diyaariyaa xidhmooyinka fidinta beeraha ee kuhaboon dhulka waraabka iyo kuwa roobka kubaxaba islamarkaana Waxa uu xaqiijinayaa, dabagal iyo lasocodna kusameynayaa tayada iyo heerka gashiyada bacriiminta iyo midhaha beeraha ee lageynayo suuqyada.

15. Waxa uu hindisaa islamarkaana diyaariyaa himilooyinka iyo barnaamijyada shaqa abuurka miyaga ee wax lagaga badali karo xaaladaha nololeed ee beeraleyda iyo xoola dhaqata beeraleyda.
16. Si barnaamijyada fidinta beeraha ee deegaanku unoqdaan midho dhal wuxuu kobciyaa, xoojiyaana awooda degmooyinka si ay bulshada beeraleydu uhelaan tababarada xirfadaha farsamo ee kala duwan.
17. Wuxuu dhisaa Suuqyada iyo bakhaarada kaydinta waxsoosaarka beeraha, waxaanu beeroleyda ka caawiyaa adeegyada iyo tabaha suuqgaynta iyo helitaanka xogaha la xidhiidha baahida iyo sicirka suuqa.
18. Wuxuu kormeer iyo dabagal kusameeyaa noocyada dhirta, abuurka xulka ah iyo calafka xoolaha ee soogalaya kana baxaya deegaankeena.
19. Waxuu dhiiri galiyaa in maalgashi lagu sameeyo waxsoosaarka beeraha iyo khayraadka dabiiciga ah sidoo kalena waxa uu siiyaa shatiga ka faa’iideysiga dhulka miyiga xubnaha maalgashashi ku sameeya dhulka miyiga.
20. Waxa uu diiwaangliyaa, Shatiga siiyaa dabagalna ku sameeyaa shaqsiyaadka, iskaashatooyinka iyo shirkadaha ku hawlan ka faa’iideysiga iyo istixmaalka dhulka miyiga ah.
21. Wuxuu xaqiijiyaa in Qeybaha uu sharciga xuquuqda u siiyay isticmaalka dhulka miyiga ee dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn, bulsha weynta miyiga, shaqsiyaadka iyo ururada iney dhaqan galiyaan bayaanada, shuruucda iyo awaamiirta hab-deegaaneedka, hab-isticmaalka iyo maamulka dhulka miyiga.
22. Isaga oo kaashanaya cida ay khuseysa ayuu daraasaad ku sameynayaa sababaha kalifay in ay beeraleydu kabarakacdo dhulbeereedka. Waxuuna xaqiijiyaa wixii magdhow ahaan loosiinayo ama dhulka kale ee loogu badalayo.
23. Wuxuu diwaangalinayaa, maamulaa, dabagal iyo lasocodna kusameeyaa hab-isticmaalka, lahaanshaha, nooca iyo baaxadda dhulka miyiga, wuxuuna qiimeeyaa natiijooyinkiisa.
24. Si looga hortago nabaad guurka iyo caro guurka waxaa uu xafiisku diyaariyaa islamarkaana fuliyaa goobaha dhirta lagu barbaariyo, waxa uu darsaa fuliyaana habka ugu haboon ee looga hortagi karo caro guurka, waraarada iyo hoos u dhaca tayada carada.

25. Waxa uu ku dadaalaa ka faa'iidaysiga fooxa, malmalka, xabkaha kala duwan iyo dhirta daawada.
26. Waxa uu diyaariyaa mashaariicda lagu xakamaynayo dildilaacyada dhulka, daadadka iyo carro-guurka, marka loo ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
27. Iyadoon waxba loo dhimayn shaqooyinka Xafiiska Waraaabka iyo dooxooyinka lagu siiyay sharciyada kale, Wuxuu fuliyaa waraabka yar-yar ee xaddigiisu yahay ilaa 250 ha; waxaa kale oo uu fuliyaa biyo qabbatinada yar-yar ee loo isticmaalo waraabka.
28. Waxaa uu fidiyaa kana caawiyaa beeralayda iyo xoolo dhaqato beeralayda tiknooloojiyada iyo farsamooyinka beeraha ee casriga ah.

**Qodobka 15aad** **<u>Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Khayraadka Xoolaha Iyo Horumarinta Reerguurga</u>**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha Xafiiska lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Khayraadka Xoolaha iyo Horumarinta Reerguuraagu wuxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Isagoo ka duulaya siyaasada iyo isteraatiijiyadaha horumarinta xoolaha nool ee dalka; waxa uu iyaarinayaa siyaasada iyo isteraatiijiyadaha Xoolaha iyo Horumarinta Reer Guuraaga ee deegaanka, marka loo ansixiyana wuu dhaqan gelinayaa.
2. Waxa uu diyaariyaa mashaariicda ku wejahan horumarinta xoolaha nool, daaqa dabiiciga ah, daaweynta iyo suuq-geynta xoolaha nool, marka loo ansixiyana wuu dhaqan gelinayaa.
3. Waxa uu dusha ka maamulaa islamarkaana maamulaa Wakaaladaha Xafiiska hoos yimaada; isaga oo hubinaya qorshayaashooda shaqo iyo miisaaniyadoodana u gudbinayaa Dawlada Deegaanka si loogu ansixiyo, marka loo ogolaadana dabagal ku sameeyaa ka midhodhalinta ujeedada loo ansixiyay.
4. Waxa uu suuro gelinayaa in si ballaadhan loo sii fidiyo adeegyada dhinaca horumarinta xoolaha, dhirta iyo daaqa si joogtaysan, lehna tashiilka dhinaca kastaba leh;

5. Waxa uu hogaamiyaa iskuna xidha Barnaamujyada iyo mashaariicaha horemarineed ee isku dhafka ah kuna wajahan isku-filaanshaha nololeed ee bulshada xoolo dhaqatada Deegaanka.
6. Waxa uu ka qeyb qaataa, isla markaasna dhiiri geliyaa fidinta adeegyada cilmi-baadhista iyo fidinta teknoolojiyadaha iyo farsamada casriga ah ee xanaanaynta xoolaha iyo ilaalinta daaqa iyo calafka Xoolaha lana gaadhsiinayo xoolo dhaqatada.
7. Isaga oo kaashanayo cida ay khusayso iskuna xidhaya ayuu suuro geliyaa xaalado kor loogu qaadayo ka ganacsiga wax soo saarka xoolaha nool iyo Suuqgeyntoodaba.
8. Isaga oo kaashanayo qaybaha ay khusayso ayuu suuro gelinayaa xaalado ay xoolo dhaqatadu ku helaana adeega deymaha;
9. Waxa uu taakulayn siinaya hantiilayaasha gaarka ah ee iyagu ka hawlgala Maalgelinta Calafka Xoolaha ee deegaanka.
10. Waxa uu dabagal iyo la socod ku samaynayaa xaaladaha caqabada ku noqon kara horumarinta xoolaha iyo Calafka Xoolaha wuxuuna fidinayaa nidaamka digniinta hore iyo u diyaar-garowga Cudurada Xoolaha.
11. Waxa uu tallaabada ku haboon ka qaadaa kahortaga iyo xakamaynta cudurada faafa ee ku dhaca xoolaha Waxaanu diyaariyaa, isla markaasna fuliyaan tabaha suuro gelinaya sidii deegaanka looga fidin lahaa hawlaha gurmadka deg dega ah ee talaalka iyo daaweynta xoolaha;
12. Isagoo la kaashanaya Xafiiska Beeraha Waxa uu xaqiijiyaa aasaasida Seerayaasha iyo dhul daaqsimeedka kaydka ah ee loo isticmaali karo quudinta xoolaha xiliga daaqla'aantu soo food saarto.
13. Waxa uu aasaasaa, Maamulaa islamarkaana Deegaanka ku fidiyaa xarumaha cilmibaadhista Xoolaha iyo horumarinta xarumaha daaweynta Xoolaha.
14. isagoo la kaashanaya cidaha ay khusayso waxa uu xaqiijiyaa in bulshada xoolo dhaqatada ah ay helaan nidaamyada taranka xoolaha ee casriga ah, Adeega deymaha, Talaalka iyo daaweynta xoolaha.
15. Waxa uu diyaarinayaa siyaasad iyo isteraatiijiyad lagu horumarin karo calafka xoolaha nool ee deegaanka, xilliga loo ansixiyana wuu dhaqan gelinayaa;
16. Waxa uu diyaarinayaa siyaasad iyo isteraatiijiyad horseeda jiritaanka hab-isticmaal caddaali ah oo ay bulshada xoolo dhaqatada ahi uga wada faa'iidaysan karaan Daaqa iyo Calafka Xoolaha; xilliga loo ansixiyana wuu dhaqan gelinayaa;

17. Waxa uu heer siyaasadeed u dejinayaa xidhmooyin horumarineed oo lagu saleeyo haweenka iyo dhalinyarada xoolo dhaqatada ah; xilliga la ansixiyana wuu dhaqangelinayaa wuxuuna dabagal iyo la socodba ku samaynayaa dhaqangelintooda;
18. Waxa uu xaqiijinayaa, dabagal iyo la socodna ku samaynayaa tayada iyo heerka gashiyada ay bulshada xoolo dhaqatada ahi u baahanyihiin sida daawooyinka xoolaha, qalabyada wax soo saarka ,tababarada iyo neefafka dhaqmaadka ah ee laga keenayo wadamada dibada ama lagu sameeyay isku talaalka ee la geynayo suuqyada deegaanka;
19. Wuxuu ka shaqeeyaa dhaqashada ama baahinta tafiirta casriga ah ee xoolaha
20. Wuxuu qaadaa talaabooyinka lagaga hortagayo laguna xakameeynayo cudurada xoolaha waxaanu tabobaro iyo wacyigelin gaadhsiiyaa Xoolo dhaqatada.
21. Waxa uu diyaariyaa istaraatiijiyada Deegaanka ee horumarinta Khayraadka Kaluunka, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
22. Waxa uu taageero iyo tabobor farsamo siiyaa shaqsiyaadka, iskaashatooyinka iyo shirkadaha ku hawlan ka faa'iideysiga khayraadka kaluunka ee Deegaanka.
23. Waxa uu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
24. Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.

**Qodobka 16$^{aad}$ Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka Iyo Dhismaha,**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha Xafiiska lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka iyo dhismahu wuxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Isagoo tixraacaya Siyaasadaha iyo Istaraatiijiyadaha Dhismaha iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Heer Federaal waxa uu dejinayaa siyaasada iyo isteraatiijiyada heer deegaan, xilliga loo ansixiyana wuu dhaqangelinayaa.
2. Wuxuu xaqiijinayaa in dhamaan hawlaha Dhismaha guryaha, Wadooyinka magaalada iyo shaqooyinka naqshadaha dhismuhu ay yihiin kuwo waafaqsan halbeegyada iyo derajooyinka loo cayimay.
3. Wuxuu dabagal ku samaynayaa dhamaan hawlaha dhismaha ee laga fulinayo deegaanka; wuxuuna samaynayaa daraasad iyo cilmi-baadhid lagu ogaanayo tignoolojiyadaha,

qalabyada dhismaha ee casriga ah ee loo adeegsanayo dhismayaasha iyo Horumarinta Magaalooyinka.

4. Waxa uu xaqiijinayaa in deegaanka si buuxda looga dhaqangeliyey shuruudaha iyo Derajooyinka naqshadaha dhismaha ee laga soo saaray heer dal iyo deegaankaba;
5. Waxa uu suurtogeliyaa in lasoo saaro shuruuc iyo awaamiir la xidhiidha hawlaha naqshadaynta dhismayaasha iyo Qorshe-hagaha magaalooyinka; marka la ansixiyana wuu dhaqangelinayaa;
6. Wuxuu soo saarayaa shuruudo lagu qiimeeyo derejeda xirfadlayaasha naqshadaynta iyo dhismaha; wuxuuna siinaya shatiga fasaxa shaqada iyo shatiga xaqiijinta kartida xirfadeed, waxaanu dabogal ku sameeyaa shaqooyinkooda.
7. Waxa uu diiwaangeliyaa, Shatiga siiyaa kalana noqon karaa Qandaraasleyaasha ka hawlgala shaqooyinka dhismaha noocyadiisa kala duwan.
8. Waxa uu Hay’adaha heer federal ee bixiya adeegyada Horumarinta kala shaqeeyaa hirgelinta mashaariicda kala duwan ee ay ka fulinayaan Deegaanka.
9. Waxa uu qabtaa hawlaha naqshadaynta dhismaha, dayactirka iyo dabagalka dhismaha; islamarkaana suuro gelinayaa fursadaha lagu siinayo qandaraas-qaatayaasha iyo shirkadaha la talinta, wuxuuna dabagal ku sameeyaa habka fulinta;
10. Wuxuu dusha ka maamuula in la dhaqan galiyo dabagalna lagu sameeyo in qandaraasyada dawlada ee lagu fulinayo miisaaniyada dawlada isagoo xaqiijinaya in lagu dhamaystiray hab waafaqsan heeshiiskii la galay iyadoo la sugayo heerka tayo, wakhtiga iyo qiimaha lagu heshiiyay.
11. Wuxuu Ogolaanshaha shaqo siiyaa qandaraslayaasha iyo la taliyaayaasha ka diiwaangashan heer dal ee u soo tartamay qandaraasyada, sidoo kale, wuxuu diiwaangaliyaa, dhirigali-yaa islamarkaana tageero u fidi-yaa Shirkadaha Guriyaynta.
12. Waxa uu suuro geliyaa in shacabku ka qayb qaataan Qorshaynta iyo hirgelinta hawlaha horumarinta magaalooyinka.
13. Waxa uu samaynayaa daraasaad iyo cilmi baadhid lagu dardar gelinayo horumarka iyo koboca dhinaca kastaaba leh ee magaalooyinka lagu horumarinyo;
14. Si xal loogu helo dhibatoyinka hoy la aanta ee ka jirta magaaloyinka deegaanka wuxuu daraasad ku sameeyaa heerka hoy’ la’aanta ee shacabka magaalooyinka islamarkaana hirgeliyaa mashaariic guryo wadareed loogoo lagu dhimayo hoy la’aanta ka jirta magaalooyinka.

15. Wuxuu bixiyaa tabobaro kor loogu qaadayo awooda fulineed iyo adeeegbixinta Magaalooyinka Deegaanka.
16. Wuxuu daraasad ku sameeyaa heerka saboolnimo ee shacabka ku dhaqan magaalooyinka Deegaanka waxaanu hirgeliyaa mashaariicda shaqo abuurka iyo damaanadqaadka cunada ee laga hirgelinayo magaalooyinka.
17. Waxa uu dabagal ku sameeyaa mashaariicda ay wadaan Xafiisyada dawladda iyo ururada aan dawliga ahayn ee laga fulinayo magaalooyinka waxanu xaqiijiyaa inay waafaqsanyihiin Baahiyaha iyo istaraatiijiyadaha horumarinta Magaalooyinka.
18. Waxa uu magaalooyinka ku dhiirigeliyaa inay iskaashi, Khibrad wadaag iyo is taageersi ku xaqiijiyaan koboc xawli ah, wuxuuna taas u abuuraa xaaladaha ku haboon;
19. Magaalooyinka Deegaanka ayuu ka aasaasaa shirkadaha yaryar iyo kuwa heerarka hoose oo ku salaysan qaab laga sameeyey daraasad; wuxuuna siiyaa taageerada xirfadeed ee ay u baahanyihiin.
20. Waxa uu fidinayaa nidaamka habka haynta xogta oo casri ah kaasi oo suuro gelinaya sidii loo dedejin lahaa hawlaha maamulka iyo hab-isticmaalka dhulka magaalooyinka iyo adeegyada laga bixinayo magaalooyinka sidoo kalena wuxuuna dabagal ku samaynayaa habka fulintiisa;
21. Waxa uu dejinayaa nidaam lagu kobcin karo hanaanka adeegbixinta magaalooyinka; wuxuuna qaab farsameysan ku dabagalayaa habka adeeg bixintooda.
22. Isagoo la kaashanayo Maamulada Magaalooyinka Waxa uu magaalooyinka ka diyaarinayaa boosaska dhulka ee Maalgelinta ku haboon, adeegyada bulsho guriyaynta, wuxuu dabagal ku samaynayaa kobcinta iyo qaybintiisa.
23. Wuxuu diyaariyaa Qorshe-hagaha magaaloyinka waxaanu xaqiijiyaa in loo hogaansamo marka la fulinayo mashaariicda iyo kafaa’iidaysiga dhulka magaalada, waxaanu magaalooyinka siiyaa taageero farsamo iyo mid aqooneed.
24. Waxa uu baadhayaa isbedelka Derajada magaalooyinka, wuxuuna go’aaminayaa Derajada magaaladu yeelanayso isagoo ka duulaya Tirada shacabka iyo dhaqdhaqaaqa ganacsi.
25. Waxa uu aqoonsi siinaya Dawladaha hoose ee ay aasaastaan magaalooyinka, wuxuuna wuxuuna qeexaa xadka Magaalada iyo Derajooyinka dhulka magaalada isagoo raacaya shuruucda dhaqangalka ah.

26. Waxa uu xaqiijinayaa inay magaalooyinka u kobciyaan qaab waafaqsan siyaasada istaraatiijiyada iyo siyaasadaha iyo Qorshe hagaha.
27. isagoo la kaashanaya cidaha ay khusayso wuxuu dabogal ku sameeyaa Mashaariicda guriyaynta ee ay shirkadaha gaarka loo leeyahay ka fulinayaan magaalooyinka deegaanka.
28. Wuxuu fudaydiyaa in la dhiso guryo u dhigma awoodda dhaqaale ee bulshada ku dhaqan magaalooyinka deegaanka.
29. wuxuu suurtogeliyaa in lasoo saaro sharci xeerinaya nidaamka maamulka iyo jaangoynya kirada guryaha dawladda, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
30. Waxa uu hogaamiyaa islamarkaana hagaa wakaaladaha xafiiska hoos yimaada, isaga oo hubinaya qorshahooda shaqo, miisaaniyadahoodana ugudbinayaa Golaha hawlfulinta, marka la ansixiyana waxa uu xaqiijiyaa ka midho dhalinta qorshayaashooda shaqo.
31. Wuxuu xaqiijiyaa in dhamaann mashaariicaha dhismaha ee laga fulinayo Magaalooyinka Deegaanka inay ka faa'iidaystaan Cududa shaqaale iyo dhalinyarada ku nool magaalada.
32. Wuxuu kormeer iyo dabagal ku sameeyaa mashaariicaha dhismaha ee ay fuliyaan Wakaaladaha Xafiiska hoosyimaada waxaanu qaadi talaabooyin sixitaan.
33. waxa uu suurtogeliyaa islamarkaana xaqiijiyaa in mashaariicda laga hirgelinayo magaalooyinka iyo miyigu ay yihiin kuwo isku xidhan oo waxtar u leh shacabka dhaqan miyiga iyo magaaladaba.
34. Waxa uu soo saaraa Awaamiirta xeerinaysa Heerka Nadaafada, Bilicda iyo Cagaaraynta ee laga rabo derajooyinka kala duwan ee Magaalooyinka, waxaanu dabogal ku sameeyaa hirgelintiisa.
35. Waxa uu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
36. Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.

**Qodobka 17^aad Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Waxbarashada**

Iyada oo ay sideeda tahay awoodaha iyo waajibaadka lagu siiyey sharaciyada kale xafiiska waxbarashadu waxa uu leeyahay awoodahan iyo waajibaadayadan;

1. Isaga oo tixraacyada halbeegyada qaranka ee dhinaca waxbarashada waxa uu diyaariyaa isla markaana dhaqan galiyaa qorshe-istaraatijadeedka waxbarasho ee waqtiga gaaban, dhexe iyo dheer ee deegaanka marka la ansixiyana wuu dhaqan geliyaa.

2. Waxa uu diyaariyaa halbeegyada (standards) laga rabo xarumaha waxbarasho ee kala duwan isaga oo waafajinaya halbegyada qaran waxaanu dabal gal ku sameeyaa in xarumaha waxbarasho ay u hogaan san yihiin.
3. Isaga oo waafajinaya manhajka qaran waxa uu diyaariyaa manhajka waxbarashada ee heerka waxbarasho ee barbaarinta, dugsiyada hoose, dhexe iyo sare iyo waxbarashada bareyaasha waxa uuna dabagal ku sameeyaa dhaqan galintooda.
4. Waxa uu diyaarin, Daabacaad iyo faafin ku sameeyaa Buugaagta manhajka waxbarasho ee deegaanka oo loo Daabacay hab tayo sare leh isla markaana Qiimo jaban oo iska bixin karaan shacabku marka loo baahdana waxa uu ku gaadhsiin karaa Ardayda lacag la, aan.
5. Waxa uu hirgaliyaa nidaam lagu xaqiijinayo ilaalinta tayada waxbarasho si loo gaadho yoolalka hormarineed ee deegaanku higsanayo waxaanu dabagal joogto ah ku sameeyaa goobaha waxbarasho ee dawlada iyo ku gaarka loo leeyahayba.
6. Waxa uu sameeyaa qorshayaasha iyo xarumo waxbarasho oo gaadhsiin kara waxbarashada reer-guuraaga iyo ardayda kale ee xaaladooda nololeed aanay u suurtaogelinaynin inay wax ka bartaan dugsiyda waxbarshada ee caadiga ah.
7. Isga oo ka jawaabaya Baahida waxbarasho ee shacabka waxa uu furaa Dugsiyo waxbarasho oo cusub, balaadhiyaa kuwo hore u jiray waxaanu daboolaa baahiyaha joogtada ah iyo kuwo dheeriga ee dhamaan xarumaha waxbarasho ee Deegaanka.
8. Waxa uu suurto galiyaa in Machadyada macalimiintu soo saaraan tirada macalimiinta deegaanku u baahan yahay oo leh tayada iyo tiradii lagama maarmaanka u ah hadba heerka waxbarasho ee ay ka hawlgalaan.
9. waxa uu daraasaad ku sameeyaa baahiyaha aqooneed ee macalimiinta ,Maamulayaasha iyo Kormeerayaashu u baahan yihiin waxaanu suurtogeliyaa in la siiyo wxabarasho iyo barnaamijyo tabobaro oo shaqada dhexdeeda ah iyo kuwo ka horeeya inta aan la shaqaaleysiin
10. Waxa uu aqoonsiga siiyaa, u cusboonaysiin karaa kalana noqon karaa xarumaha waxbarasho ee kala duwan waxaa kale oo uu shahaadada tayada xirfadeed siiyaa macalimiinta wax ka dhiga heerarka kala duwan iyo Hogaaminta waxbarashada ( Kormeerayaasha iyo Maamulayaasha) ee deegaanka.

11. Waxa uu diyaariyaa islamarkaana hirgeliyaa imtixaanada fasalka 8aad waxaanu suurtogeliyaa habsami u socodka imtixaanada Heer qaran ee 10^aad iyo 12^aad, waxaanu bixiyaa shahaada Aqoonsiga dhibcaha.
12. Waxa uu sameeyaa Abaabulka Qorista ardayda billowga sanad-dugsiyeedka isaga oo wacyigelino baahsan oo lagu gaadhayo shacabka ku nool tuulooyinka iyo Degmooyinka ku gaadhsiinaya tabooyin kala sida Warbaahinta dawlada iyo mida gaarka loo leeyahayba .
13. Waxa uu ururiyaa , falanqeeyaa islamarkaana xafidaa xogta waxbarashada deegaanka waxaanu u gudbin karaa cidaha ay khusayso .
14. Waxa uu suurtogeliyaa in shacabka laga qaybgeliyo Qorshaynta, Miisaaniyad diyaarinta iyo hormarinta waxbarashada guud ahaan iyo gaar ahaan arimaha khuseeya dugsiyada.
15. Waxa uu suurtogeliyaa in dugsiyada Dawladdu Deeqo toos ah ka helaan Hay`adaha kala duwan iyo Shirkadaha gaarka loo leeyahay.
16. Waxa uu suurtogeliyaa in Sharciyada iyo siyaasadaha waxbarasho ee deegaanka iyo kuwa dalkaba laga dhaqangeliyo xarumaha waxbarasho ee kala duwan ee Deegaanka ku yaal.
17. Wuxuu fidiyaa islamarkaana gaadhsiiya Dugsiyada waxbarashada qalabka tiknoolojiyada ku haboon ee waxtarka u leh tayada baris-barashada.
18. Waxa uu xaqiijiyaa in goobaha waxbarashadu noqdaan kuwo deegaan ahaan ku haboon Waxbarashada islamarkaana ay yeeshaan waxyaabahaha aasaasiga u ah waxbarista iyo Abuurista deegaan waxbarasho ku haboon.
19. Waxa uu aasaasaa Dugsiyo ku haboon dadka waaweyn iyo ardayda qabta baahiyaha gaarka ah waxaanu xaqiijiyaa in la diyaariyo dhamaan waxyaabihii baris-barasho ee lagama maarmaanka u ahaa oo ay kamid yihiin bareyaashii ku haboonaa.
20. Waxaa uu samaynayaa in bulshadu ka qayb qaadato horumarinta waxbarashada iyo dhismaha dugsiyada isaga oo isticmaalaya sanduuqa horumarinta waxbarashada (educational development fund).
21. Waxa uu suura galinayaa in uu iskuxidho islamarkaana dabagalo haayadaha aan dawliga ahayn ee ku hawlan hawlaha waxbarashada.
22. Waxa uu shaqaaleeyaa ama meeleeyaa macalimiinta, kor meerayaasha, iyo maamulayaasha dugsiyada waxbarashada deegaanka.

23. Waxa uu kala saara   islamarkaana darajo siyaa dugsiyada aan dawliga ahayn.
24. Waa mulkiile hanti, wuxuu galaa heshiisyo waana la dacweyn karaa waxna uu ku dacweyn karaa magaciisa.

**Qodobka 18aad Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Caafimaadka**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha Xafiiska lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Caafimaadku wuxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Isagoo kaduulaya Siyaasada iyo Istaraatiijiyada Caafimaadka ee federaalka, wuxuu diyaariyaa Siyaasadaha, Istaraatiijiyadaha iyo himilooyinka caafimaadka oo ay gundhig u tahay kahortegista cudurada ee deegaanka, marka la ansixinayana wuu dhaqangeliyaa.
2. Waxa uu xaqiijiyaa in Deegaanka laga dhaqangeliyo shuruucda dhaqangalka ah ee la xidhiidha adeegbixinta Caafimaadka waxaanu talobixin u gudbin karaa golaha hawlfulinta.
3. Wuxuu xaqiijiyaa in dhamaan shacabka deegaanka la gaadhsiiyo Adeegga caafimaad oo degdegsiimo leh islamarkaana qiimo jaban isagoo tixgelin gaar ah siinaya shacabka reer guuraaga ah waxaanu dabagal joogto ah ku sameeyaa tayada adeegga caafimaad ee deegaanka.
4. Waxa uu dhisaa, maamulaa islamarkaana xaqiijiyaa in baahiyahooda qalab iyo xirfadeedba la dhamaystiray Xarumaha Caafimaad, Cusbitaalada heerarkooda kala duwan ee Deegaanka, islamarkaana wuxuu xaqiijiyaa inay Xarumaha Caafimaad iyo Cusbitaalada heerarkooda waafaqsanyihiin Halbeegii la ansixiyay.
5. Waxa uu soo iibiyaa Dawooyinka iyo Agabka Caafimaad ee ay u baahanyihiin xarumaha Caafimaadka iyo Cusbitaalada Deegaanka waxaanu xaqiijiyaa in waqtiga ku haboon lagu gaadhsiiyo.
6. Waxa uu Qorsheeyaa islamarkaana gaadhsiiyaa Xarumaha Caafimaadka iyo Cusbitaalada heerarkooda kala duwan taageerada tooska ah ee xafiisku ka helo hay’adaha iyo bahwadaagta caawisa sectorka caafimaadka.
7. Waxa uu xaqiijiyaa in barnaamijyada la xidhiidha Caafimaadka ee hay’adaha aan dawliga ahayn ka fulinayaan deegaanka in ay waafaqsanyihiin Istaraatiijiyadda caafimaadka ee Deegaanka islamarkaana ay noqdaan kuwo midho dhal ah.

8. Waxaa uu soo saaraa Awaamiiirta qiimaynta, shuruudaha laga rabo adeega caafimaadka ee ay aasaasayaan ganacsatada gaarka ah waxaanu siiyaa ogolaanshaha sharci isagoo xaqiijinaya in dabogal lagu sameeyo adeeg bixintooda.
9. Wuxuu Abaabulaa Kooxaha wareega ee adeegbixinta caafimaadka siiya Bulshada xoolo dhaqatada ah waxaanu xaqiijiyaa in loo dhamaystiry Cududii shaqaale, Qalab iyo agabyada kala duwan ee caafimaadka waxaanu dabagal ku sameeyaa hanaanka adeeg bixintooda.
10. isagoo daraasad ku samaynaya sababaha keena cudurada faafa, Naafominada iyo dhimashada Waxaa uu dajiyaa oo uu curiyaa siyaabaha lagaga hortegi karo hortagayo laguna dabargoynkaro cuduradan, waxaanu xaqiijiyaa in la dhaqangeliyo arrimaha kasoo baxa daraasadaas.
11. wuxuu magacaabaa iskuduweyaasha Caafimaadka Gobolada, Maareyeyaasha Xarumaha Caafimaadka, Maareeyeyaasha Cusbitaalada iyo Xubnaha Golaha maamulka Cusbitaalada (Board) sidoo kalena waxa uu meeleeyaa Xirfadleyaasha Caafimaadka ee ka hawlgelaya xarumaha caafimaadka ee kala duwan.
12. Waxuu taageerada lagama maarmaanka ah siiyaa kuliyadaha Caafimaadka ee deegaanka si ay usoo saaraan tirada xirfadleyaasha caafimaadka deegaanku u baahanyahay oo leh tayadii la rabay.
13. Si loo helo adeeg caafimaad oo isu dheelitiran ayuu dagmooyinka iyo Maamulada magaalooyinka siiyaa taageero xirfadeed, tabobar iyo mid qalaba waxaanu xaqiijiyaa in xarumaha caafimaadku yeeshaan isku xidhnaan iyo wadashaqeyn.
14. Si loo daboolo baahida dhakhaatiirta, Kalkaaliyeyaasha iyo xirfadleyaasha kale ee uu deegaanku u baahan yahay waxa uu heshiis la geli karaa xarumaha waxbarasho ee deegaanka iyo kuwo dalka ee bixiya aqoonta sare.
15. Wuxuu ururiyaa islamarkaana falanqeeyaa xogta la xidhiidha Cudurada faafa ee ka dilaaca deegaanka gudihiisa waxaanu la wadaagaa xogtan cidaha ay khusayso.
16. Waxa uu taageerada lagama maarmaanka ah siiyaa Rugaha Caafimaadka, Xarumaha caafimaadka iyo Cusbitaalada Deegaanka si loo xoojiyo nidaamka kahortaga cudurada kayimaada cuno la‘aanta, Nadaafad xumada iyo fayadhawrka.
17. Waxaa uu taageerada loo baahanyahy kagaystaa sidii qorshaha talaalka hooyada iyo dhalaanka sibalaadhan loogu fidiyo deegaanka waxaanu dabogal ku sameeyaa heerka dabool iyo natiijooyinka warbixinta talaalada.

18. Waxaa uu taageerada loo baahanyahay kagaystaa sidii deegaanka loogu fidin lahaa qorshe hawleedka fidinta adeega caafimaadka.
19. Waxa uu bulshada gaadhsiiyaa adeegyada qorshaynta qoyska iyo adeegyada caafimaad ee la siiyo hooyada dhalmada kahor iyo kadib.
20. Waxa uu meelaha ay kaneecadu ku badantahay ee deegaanka ka qabtaa shaqada ka hortaga cudurka Duumada, taas oo ay bulshadu kaqaybqaadanayso islamarkaana wuxuu shacabka gaadhsiiyaa daawooyinka iyo qalabka daruuriga u ah kahortaga.
21. Waxa uu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
22. Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.

**Qodobka 19aad Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Maaliyada**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha Xafiiska lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Maaliyaddu wuxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Wuxuu dejiyaa fulinta siyaasadaha maaliyadeed iyo dakhliga (fiscal policy) iyo qorshaha maaliyadeed ee xiliga dhexe (mid-term expenditure and fiscal frame work) Deegaanka.
2. Wuxuu ka gorgortamaa, saxeexaa islamarkaana maamulaa heshiisyada deymaha, deeqaha iyo mashaariicda kale ee lagu taageero dawladda deegaanka.
3. Wuxuu diyaariyaa qorshayaasha deegaanka ee wakhtiga gaaban iyo dhexe wuxuuna kormeeraa islamarkaana qiimeeyaa fulintooda.
4. Wuxuu degmooyinka ka tageeraa dhinacyada diyaarinta qorshaha, miisaaniyada iyo maaraynta maaliyadeed.
5. Wuxuu dabagalaa iskuna dubaridaa shaqooyinka ay qabtaan Ha‘yadaha aan Dawliga ahayn ee la xidhiidha mashaariicda la xidhiidha horumarka dhaqaale iyo bulsho ee deegaanka.
6. Wuxuu darsaa diyaariyaana qaaciidada jaangoynta iyo qoondeynta miisaaniyada oo kusaleysan caddaaalad iyo sinaan wuxuuna u gudbiyaa hay’adaha ay khusayso si ay u ansixiyaan.
7. Wuxuu xaqiijiyaa islamarkaana hubiyaa in qorshayaasha iyo mashaariicda horumarined ka turjumayaan awoodsiinta haweenka iyo qaybaha nugul ee bulshada Deegaanka.
8. Isaga oo daraasad ku samaynaya qorshaha miisaaniyadeed ee ay soo gudbiyaan

xafiisyada, wakaaladaha, kuliyadaha, mac-hadyada, komishinada, dugsiyada hoyga, gobolada, degmooyinka iyo maamulada magaalooyinka ayuu qiimeyn ku sameeyaa, isku duba ridaa, kadibna u gudbiyaa talo bixinta golaha fulinta iyo gudiga joogtada ah ee arrimaha maaliyada ee baarlamaanka si ay uga talo bixiyaan una ansixiyaan; kadibna wuxuu talo bixinta ugu danbeysa u gudbiyaa golaha hawlfulinta si ay u meel mariyaan.

9. Wuxuu hubiyaa islamarkaasna mideeyaa qoondada miisaaniyadda caadiga ah iyo miisaaniyadda mashaariicda (horumarinta), miisaaniyadda uu ka talabixiyayna wuxuu u gudbiyaa hay'adaha ay khusayso si ay u ansixiyaan. Sidoo kale, wuxuu maamulaa fasaxaana miisaaniyadda la ansixiyay.
10. Isaga oo xidhiidhinaya, isku dubaridayo, dabagalna ku samaynaya deymaha iyo deeqaha laga helo hay'adaha aan dawliga ahayn ayuu suuro gelinayaa sidii qaab u dheelitiran loola fulin lahaa miisaaniyada hawlaha shaqo ee horumarka deegaanka;
11. Waxa uu xafiisyada iyo hay'adaha dawlada ku dabagalayaa inay qaab waafaqsan Shuruucda iyo siyaasadaha maaliyadeed ee dawlada deegaanka ugu shaqeeyaan miisaaniyada.
12. Haddii uu soo xeroodo dakhli dheeraad ah, isaga oo la xidhiidhaya xafiisyada ay khusayso ayuu diyaarinayaa qorshaha lagu fulinayo dakhliga dheeraadka ah, kadibna wuxuu diyaarinayaa bayaanka meelmarinta miisaaniyada dheeriga ah, wuxuuna ugudbinayaa golaha fulinta iyo golaha baarlamaanka si ay u ansixiyaan..
13. Wuxuu meelmariyaa hirgaliyaana dib-u-habeynta maamulka maaliyadeed
14. Wuxuu hayaa maamulaana saamiyada, lacagta iyo hantida kale ee Dawladda Deegaanka.
15. Wuxuu Tabobaro lagu kobcinayo aqoonta Nidaamka maamulka maaliyadda iyo maamulka hantida siiyaa Shaqaalaha iyo masuuliyiinta heerarka kala duwan ee maamul waxaanu dabagal joogta ah ku sameeyaa baahida tabobar.
16. Waxa uu soo iibiyaa xafiisyada dawladda iyo qaabdhismeedka heerarkiisa kala duwan Alaabaha iyo adeegyada kala duwan ee sharcigu xeeriyay.
17. Wuxuu hirgaliyaa nidaaamyada maareynta miisaaniyadda iyo xisaabaadka oo horumarsan islamar ahaantaana dabagalaa fulintooda.
18. Wuxuu diyaariyaa warbixinta guud ee ku saabsan waxqabadka maaliyadeed, heerka iyo hanaanka isticmaalka miisaaniyadda.

19. Wuxuu kormeeraa islamarkaasna dabagalaal isticmaalka miisaaniyadda iyo fulinta mashaariicaha horumarineed.
20. Wuxuu kormeeraa islamarkaasna dabagalaa isticmaalka maaliyadeed iyo maamulka hantida dawlada isaga oo xaqiijinaya ku-dhaqanka shuruucda iyo xeerarka u dajisan dalka iyo deegaankaba.
21. Wuxuu diyaariyaa soona saaraa awaamiirta lagu hagayo geedi-socodka nidaamka iibka iyo maamulka hantida dawladda.
22. Waxa uu diyaarinayaa Qorshaha Xilliga Dheer oo lagu saleeyo istiraatijiyadda horumarineed ee heer dal; marka la ansixiyana wuu dhaqangaliyaa.
23. Waxa uu ururiyaa islamarkaasna kaydiyaa xogta khayraadka dabiiciga ah ee beeraha, warshadaha, waxsoosaarka iyo dadweynaha waxaanuu u gudbiyaa cidda ay khuseyso.
24. Waxa uu diyaariyaa darasaadaha juquraafiyada dhulka ee la xidhiidha qaabka bulshadu u deggan tahay, beeraha, xoolaha, togagga iyo kala-sareynta dhulka wuxuuna xaqiijiyaan in xogahani gundhig u noqdaa qorshayaasha iyo mashaariicaha horumarineed.
25. Waxa uu diyaariyaa daraasadaha dhaqan-dhaqaale ee Deegaanka, waxaanu xaqiijiyaa in la fuliyo talooyinka kasoo baxa.
26. Wuxuu darsaa, dabagalaa islamarkaasna xaqiijiyaa in waxqabadka halbeegyada horumarineed ee Deegaanku noqdaan kuwo ka jawaabaya xaaladda dhabta ah ee dhaqaale ee Deegaanka.
27. Waxa uu sameeyaa daraasaadka qiyaasta heerka iyo xawliga koboca dhaqaale ee Deegaanka.
28. Waxa uu bixiyaa tababarrada iyo wacyigalinada kusaaban kor-u-qaadidda awoodda qorsheyneed iyo maamulka dhaqaalaha ee heerarka kala-duwan ee qaab-dhismeedka dawladda.
29. Waxaa uu soo saaraa documentiyada habraacyada iyo hagayaasha qorshayaasha horumarineed ee natiijada ku salaysan ee heerarka kala-duwan ee qaab-dhismeedka dawladda.
30. Waxa uu dhisaa, kobciyaa islamarkaasna horumariyaa nidaamka dabagalka iyo qiimeynta natiijada kusaleysan ee heerarka kala-duwan ee qaab-dhismeedka dawladda.

31. horumarineed sectorada ee sannadlaha ah (indicator-based monitoring & evaluation); wuxuuna soo saaraa casharada laga baran karo iyo caqabadaha sida joogtada ah ay ula kulmaan ka midho dhalinta hiigsiga yoolasha qorshe sandeedka la dejistay, wuxuuna warbixinta u gudbiyaa cida ay khusayso.
32. Waxaa uu fulinayaa nidaamka daraasaadka xogta ee lagu soo ururinayo xogaha hab deegaaneedka iyo tirakoobka ee loogu baahan yahay hawlaha qorsheynta ee deegaanka.
33. Waxa uu soo saarayaa awaamiirta iyo hab-raacyada ka gacan geysanaya habka fulinta siyaasada arimaha dadweynaha ee deegaanka,
34. Waxaa uu ka shaqaynayaa sidii deegaanka looga dhaqan gelin lahaa siyaasada arrimaha dadweynaha; waxaa uu xidhiidhinayaa cilmi baadhista iyo dood cilmiyeedyada laga samaynayo arrimaha dadweynaha ee deegaanka; wuuna dhiirigelinayaa;
35. Waxa uu diyaariyaa daraasadaha la xidhiidha isku-sargoynta heerka korodhka tirada dadweynaha iyo diyaarinta qorsheyaasha horumarineed.
36. Waxaa uu sameeyaa daraasado lagu ogaanayo xaalada ay ku suganyihiin kaabayaasha horumarineed ee deegaanka, waxaanu xaqiijiyaa in la fuliyo talooyinka kasoo baxa.
37. Waxaana uu xaqiijinayaa isla markaana ka dhex hubinayaa qorshayaasha horumarineed ee la diyaariyay in ay tixgelin siinayaan haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh.
38. Waxa uu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
39. Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.

**Qodobka 20[aad] Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Adeega Shacabka Iyo Horumarinta Cududa Shaqaalaha.**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha Xafiiska lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Adeega Shacabka iyo Horumarinta Cududa Shaqaalahu wuxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Waxuu daraasad ku sameeyaa nidaamka loo hirgelin karo nidaam adeegbixineed ee xafiisyada dawladda iyadoo lagu xisaabtamayo baahida cududeed ee fulinta

shaqooyinka waxaanu talooyinka kasoo baxa u gudbiyaa golaha hawlfulinta, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.

2. Waxa uu maamulaa, dabogal ku sameeyaa islamarkaana xaqiijiyaa inay waaafqsantahay shuruucda dhaqangalka ah qoondaynta shaqaalaha iyo arrimaha la xidhiidha mushaharka, gunooyinka iyo habeen dhaxooda.
3. Isaga oo daraasad ku samaynaya gol daloolaha ka jira dhinaca qaab-dhismeedka, nidaamyada shaqo iyo cududa shaqaale ee heerarka kala duwaan ee maamul ayuu dejinayaa isteraatiijiyad suuro gelisa sidii mustaqbalka looga keeni lahaa isbedel joogtaysan, wuu ansixinayaa, fulinayaa, dabagalna ku samaynayaa;
4. Si loo xoojiyo dhaadhicinta nidaamka maamulka waxuu tageero farsamo, nid aqooneed iyo mid tabobarba siiyaa qaabdhismeedka maamul heerarkiisa kala duwan.
5. Waxa uu dersayaa fikirkiisana ka soo jeedinayaa sababaha la xidhiidha dhibaatooyinka maamulka suubban, wuxuuna diyaariyaa xaalado suurto gelisa in deegaanka si joogta ah looga hirgeliyo nidaamka maamulka suubban; wuxuuna natiijada daraasada u gudbiyaa Golaha hawlfulinta marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
6. Wuxuu Deegaanka ka dhaqangeliyaa dib u habaynta iyo Reform-yada kala duwan ee dalka laga hirgelinayo waxaanu dabagal joogto ah ku sameeyaa habsami u socodka iyo dhaqangalkooda.
7. Isagoo tixraac ku samaynaya siyaasada iyo istaraatiijiyadaha kobcinta awooda iyo horumarinta cududa shaqaalaha ee dalka waxa uu diyaariyaa siyaasada iyo istaraatiijiyada kobcinta awooda iyo horumarinta Cududa shaqaalaha ee Deegaanka marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
8. Waxa uu samaynayaa daraasad suurto gelisa in la helo xog hufan oo leh qiime u dheelitiran; wuxuuna soo dhaweynayaa fikirkiisa go’aan, marka la ansixiyana wuxuu kala shaqaynayaa qaybaha ay khusayso wuxuuna ku dabagalayaa dhaqangelinteeda;
9. Isagoo dhaqangelinaya sharciyada dhaqangalka ah, Waxa uu go’aaminayaa tallaabooyinka xafiisyada iyo qaabdhismeedka maamul heerarkiisa kala duwan ka qaadaan shaqaalaha dawlada iyo codsiyada kordhinta Mudada hawl-galka ee shaqaalaha dawlada.
10. Isaga oo ka duulayaa shuruudaha heer dal ayuu daraasad ka samaynayaa xuquuqaha, faa’iidooyinka iyo magdhawyada kale ee loo fulinayo shaqaalaha dawlada iyo kuwa

magacaabista ah, wuxuuna u gudbinayaa Golaha Fulinta ee deegaanka, marka la ansixiyana ka shaqaynayaa dhaqangelintooda;

11. Wuxuu xafidayaa isla markaasna gorfaynayaa xogta cududa shaqaale ee xafiisyada dawlada; marka loo baahdana waxa uu u gudbinayaa cidii ay khusayso;
12. Waxa uu kelifayaa in shaqaalaynta, qaab-dhismeedka, dalacaada derejeda, bedelka iyo tababarada ay samaynayaan xafiisyada deegaankeennu noqdaan kuwo waafaqsan Sharciga iyo nidaamyada loo dejiyey; hadii ay dhacdo qaab ka baxsan sharciguna waxa uu ka qaadanayaa tallaabada ku haboon;
13. Isaga oo ka duulayo cabashooyinka iyo ka eed sheegashada laga soo jeediyo hawlaha nidaamka maamulka cududa shaqaale ee xafiisyada dawlada, meel-ka-dhaca iyo tallaabooyinka anshaxa ayuu go'aanka kama dambaysta ah ka gaadhayaan; wuxuuna fidinayaa nidaam ay shaqaalaha dawladu xilli gaaban, kharash yar iyo wakhti koobanba ku helaana xalka ay u baahan yihiin;
14. Waxa uu xaqiijiyaa in qaabdhismeedka heerarkiisa kala duwan laga dhaqangelyo shuruucda maamulka shaqaalaha waxaanu talooyin iyo tabobaro la xidhiidha shuruucda maamulka shaqaalaha siiyaa qaabdhismeedka heerarkiisa kala duwan.
15. Wuxuu diyaarinayaa shuruudaha looga baahan yahay fursadaha waxbarasho, tababarada iyo is-dhaafsiga waaya'aragnimo ee looga baahan yahay shaqaalaha dawlada;
16. Waxa uu soo saarayaa awaamiir faahfaahsan oo lagu qiimeeyo natiijada waxqabadka shaqada ee shaqaalaha dawlada deegaanka, wuxuuna dabagal ku samaynayaa dhaqangalkooda;
17. waxa uu Go'aan kamadambays ah ka qaataa Talaabooyinka ay xafiisyada dawladdu ka qaadaan shaqaalaha ee la xidhiidha Shaqaalaynta, Boos-bedelka, Dalacsiinta, Hoos u dhigista, Shaqo ka caydhinta iyo ganaaxyada isagoo tixraacaya Sharciyada Maamulka shaqaalaha ee dhaqangalka ah.
18. Isaga oo la kaashanayo hay'adaha ay khusayso ayuu qiimaynayaa qaab-dhismeedka iyo habka adeegsiga cududa shaqaale ee dawlada deegaanka; wuxuuna soo gudbinayaa fikirkiisa dib u habaynta u haboon, marka loo ansixiyana dabagal ku samaynayaa dhaqangelintiisa;
19. Wuxuu darsayaa iskeelada mishaarka ee la siinayo shaqaalaha dawlada deegaanka, xilliga loo ansixiyana dabagal ku samaynayaa dhaqangelintooda;

20. Wuxuu diyaarinayaa daraasado la xidhiidha xuquuqaha iyo faa'iidooyinka kala duwan iyo habeen-dhaxyada shaqaalaha deegaanka, wuxuuna u gudbinayaa cida ay khusayso, marka loo ansixiyana wuu dhaqangelinayaa;
21. Waxa uu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
22. Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.

**Qodobka 21[aad] Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Jidadka iyo Gaadiidka**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha Xafiiska lagu siiyay Sharciyada kale,Xafiiska Jidadka iyo Gaadiidku wuxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Isaga oo ka duulayo siyaasadaha iyo isteraatiijiyada loo dejiyey heer federaal una dheelitiraya xaaladaha deegaanka ayuu dejinayaa siyaasada iyo isteraatiijiyadaha Gaadiidka, Samaynta Jidadka iyo Sugida Amniga Wadooyinkaee deegaanka, xilliga la ansixiyana wuu dhaqangelinayaa;
2. Waxa uu xaqiijinayaa in dhamaan hawlaha laga qabanayo dhinaca dhismaha wadooyinka iyo shaqooyinka naqshadaha dhismaha intuba inay waafaqsan yihiin heerka derejo ee loo cayimay;
3. Wuxuu dabagal ku samaynayaa dhamaan hawlaha dhismaha iyo dayactirka jiddadka ee laga fulinayo deegaanka; wuxuuna samaynayaa daraasad iyo cilmi-baadhid lagu soo geliyo tignoolojiyadaha, qalabyada casriga ah ee loo adeegsanayo dhismayaasha iyo dayactirka jiddadka;
4. Waxa uu dejinayaa shuruuc iyo awaamiir la xidhiidha hawlaha naqshadaynta iyo dhismayaasha jidadka ee laga fulinayo deegaanka; wuxuu kelifayaa in la diyaariyo, marka la ansixiyana wuu dhaqangelinayaa;
5. Waxa uu xaqiijiyaa in dhimaha jidadka ay ka qaybqaataan bulshada isagoo u fidinaya taakulayn farsamo xidhiidhinayana shaqadooda;
6. Waxa uu Xaqiijiyaa in Magaalooyinka iyo Degmooyinka la gaadhsiiyo adeeg Gaadiid oo tayo sare leh, wax ku ool ah islamarkaana shacabka ka haqabtira baahida Gaadiid.
7. Waxa uu Diiwaangeliyaa Islamarkaana Iskaashatooyinka gaadiidleyda Deegaanka ka shaqeeya waxaanu Ansixiyaa Jadwalka Shaqo ee ay soo gudbiyaan isaga oo dabogal ku sameeya habsami u socodkiisa.
8. Waxa uu dhisaa, Kobciyaa islamarkaana Shatiga siiyaa Iskaashatooyinka Gaadiidka Deegaanka dhexdiisa ka shaqeeya isagoo xaqiiijinaya inay buuxiyeen shuruudaha iskaashato ee sharciga lagu xeeriyay.
9. Waxa uu fuliyaa Ganaaxyada la saaro Baabuurta iyo Wadeyaasha ku xadgudba Shuruucda Wadomarista iyo badbaadada isagoo raacaya Shuruucda dhaqangalka ah.
10. isagoo wadashaqeyn dhaw la samaynaya Waaxda Ilaalinta Nabadgelyada wadooyinka ee Komishinka Booliska waxa uu xaqiiijiyaa in la dhaqangeliyo shuruucda Wadomarista iyo badbaadada waxaanu xaqiijiyaa in wadeyaasha ku xadgudba ay helaan Ciqaabta Sharci eek u haboon.
11. Waxa uu go'aamiyaa Tirada dadka ama rarka ay Qaadi karaan Gaadiidku isaga oo u kala samaynaya Derajooyin waxaanu ansixiyaa xaddiga Kirada ah ee ay qaadi karaan gaadiidka ama shirkadaha Gaadiidka ka shaqeeya.
12. Waxa uu Diiwaangeliyaa islamarkaana siiyaa Shatiga Wadista Baabuurta shaqsiyaadka bartay xirfada wadista Baabuurta isaga oo u diyaarinaya imtixaan lagu tijaabinayo Aqoonta iyo kartida wadenimo.
13. Waxa uu Diiwaangeliyaa oo Dabogal ku sameeyaa islamarkaana Xaqiijiyaa tayada Gaadiidka, Goobaha Dayactirka baabuurta (Geerashyada) iyo Dugsiyada lagu barto Wadista iyo Mekaanikada ee Deegaanka Gudihiisa.
14. Isaga oo kala shaqeynaya Wasaaradaha ay khusayso, waxa uu xaqiijiyaa in Astaamaha iyo Calamaadaha wadomarista Deegaanka dhexdiisa la Dhamaystiro Dayactir joogto ahna lagu sameeyo.
15. Waxa uu ka shaqeeyaa sidii Magaalooyinka iyo Degmooyinka Deegaanka loo gaadhsiin lahaa Adeegga kala hagista baabuurta ee laydhka ku shaqeeya iyo astaamaha la xidhiidha.

16. Waxa uu dhisaa, Dayactiraa islamarkaana maamulaa qaab shaqedkiisa Goobaha Gaadiidka Magaalooyinka iskaga goosha (Menheriya).
17. Isaga oo la kaashanaya Xafiisyada ay khusayso, Waxa uu Xaqiijiyaa inuu fududeeyo Shaqooyinka gaadiidka Cirka, Dhulka iyo Tareenka ee laga fulinayo Deegaanka dhexdiisa.
18. Waxa uu dabagalayaa in adeega gaadiidku yahay mid u haboon rabitaanka loo adeegayaasha; marka lala kulmo dhibaato dhinaca Gaadiidka ah ama ay jirto xaalad degdeg ah oo loogu baahdo gaadiid dheeraad ah waxa uu hawlgelinayaa baabuurta ka shaqayso Ganacsiga ee shakhsi ahaan, shirkad ahaan ama urur ahaan loo leeyahay;
19. Gaadiidka sameeyey baadhis sannadeedka dhinacyada farsamo ayuu siinaya cadaynta tayada baabuurka ee boolada lagu dhejiyo muraayadiisa;
20. Wuxuu go'aaminayaa tacriifta qiimaha adeega Gaadiidka, wuxuuna dabagal kusamaynayaa dhaqangelinteeda;
21. waxa uu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
22. Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.

**22 Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Nabadgelyada**

Iyada oo ay sideeda tahay Awoodaha iyo Waajibaadyada lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Nabadgalyadu waxa uu Yeelanayaa Awodahan iyo Waajibaadyadan.

1. Waxaa uu dabagalaa Islamarkaana ilaaliyaa Nabadgaliyada guud, kala dambaynta iyo ilaalinta Badbaadada qaybaha kala duwan ee bulshada.
2. Waxaa uu dabagalaa shaqooyinka ay wadaan ururada iyo Xubnaha ku hawlan Burburinta nidaamka dastuuriga ah waxaa uu isku dayaa inuu ka hortago intaanay ururada iyo shaqsiyaadkani meelmarin ujeedooyinkooda.
3. Waxaa uu xaqjiyaa islamarkaana abuuraa nidaam is afgaranwaayada iyo isku dhacyada ka dhexdhaca Bulshada qaybaheeda kala duwan ee ku nool Gobolada, Degmooyinka iyo tuulooyinka ku xalisan karaan khilaafyadooda si nabad iyo wada hadal ah.
4. Isaga oo la xidhiidhaya Deegaanada ay khusayso waxa uu xaqiijiiyaa in isku dhacayada ka dhex dhaca shacabka deegaanka iyo shacabka deegaanda deriska ah lagu xaliyo hab wada hadl iyo nabad ah .
5. Waxaa uu daraasad ku sameeyaa waxyaabaha keena khilaafyada iyo isku dhacyada qaybaha bulshada ee soo noqnoqda waxaanu isaga oo adeegsanaya qaabdhismeedyada iyo Hogaamiyeyaal dhaqameedyada suurto geliyaa sidii xal waara looga gaadhi lahaa.
6. Waxaa uu suurto geliyaa in Nabadgeliyada iyo Deganaanshaha Deegaanka lagu ilaaliyo ka hortegdi iyo ka qeybgelinta shacabka si loo xaqiijiyo in shacabku kaalin wax kuool ah ka qaataan ilaalinta nabadgelyada iyo ka hortaga isku dhacyada.
7. Wuxuu abuura sidii nidaam nabadeed loogu xalin lahaa khilaafyada is-afgaran waaga ka dhex dhaca deegaanada dariska ah iyo isku dhacyada deegaanka gudihiisa xal waara si looga gaadhana waxa uu darsaa khilaafyada islamarkaana isaga oo cidda ay khusayo iskaashi shaqo la sameeyanaya ayuu xalintooda ku dadaalaa.
8. Waxaa uu Xaqiijiyaa in maxaabiisya loo hayo nidaam ayna mustaqbalka dhibaato ku ahaanin nabadgaliyada deegaanka iyadoo loo diyaarinayo barnaamijyo dhaqancelin iyo tababaro joogto ah si marka la sii daayo kadib shacabka ula noolaan karaan.
9. Waxuu daraasad ku sameeyaa baahida cududa ciidan ee hay'adaha nabadgaliyada ee Deegaanka waxaanu xaqiijiyaa sidii loo dabooli lahaa baahiyahan.
10. Waxaa uu qataa shaqooyinka soo iibinta hubka iyo agabka kale ee ay u baahanyihiin hay'adaha nabadgaliyada ee Deegaanka.

11. Waxa uu kormeeraa hawlaha bixinta ogolaanshaha haysashada hubka waxaanu xaqiijiyaa in komishinka boolisku uu raacayo marka uu bixinayo oogolaanshaha iyo cusboonaysiintaba inuu raacayo sharciyada dhaqangalka ah
12. Waxa uu siiyaa shatiga ogolaanshaha shaqada kalana noqon karaa shirkadaha gaarka ah ee ka shaqeeya ilaalinta Aminga (Security Firms).
13. Waxaa uu Xidhiidha wada shaqeyneed arrimaha la xidhiidha ka hortaga iyo xalinta khilaafaadka, Ilaalinta Amniga iyo ka hortaga dambiyada abaabulan la sameeyaa hay'adaha heer federal ee ay khusayso.
14. Wuxuu xulaa, habeeya tababaraa islamarkaana hawl galiyaa xoogaga maleeshiyada ee heerarka kala duwan laga dhisayo isaga oo raacaya awaamiirta iyo shuruucda dawladu u dajisay.
15. Wuxuu dabagalaa in ay xoogaga Booliska iyo Maleeshiyada ee Deegaanka laga dhisay ay si foojigan uga shaqeeyaan si aan faldambiyeed deegaanka uga dhicin ama looga dhex fulin.
16. Wuxuu uuriyaa macluumaadka iyo xogaha ku saabsan amniga iyo xasiloonada deegaanka iskamarkaana isaga oo falanqeynaya xogtaas kana duulaya ayuu talaabooyin xal u noqda qaadaa.
17. wuxuu magacaabaa Saaraakiisha Magacaabista ah ee ku jirta
18. Wuxuu daba gal iyo qiimayn ku sameeyaa qaab shaqeedka Xafiisyada Nabadgaliyada ee Qaabdhismeedka heerarkiisa kala duwan.
19. Waxa uu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu xaqiijinayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
20. Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.

**23. Awoodaha iyo Waajibaadka Xeer ilaalinta guud**

iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha iyo waajibaadka lagu siiyay sharciyada kale, Xeer-ilaalinta Guud waxa ay yeelanaysaa Awoodahan iyo Waajiabadyadan:

1) Isaga oo xidhiidha la samaynaya Cida ay khusayso waxa Hogaamiyaa diyaarinta Siyaasadda Dambiyada Deegaanka waxaanu xaqiijiyaa dhaqangalkeeda marka la ansixiyo.
2) Waa la taliyaha Guud iyo Qareenka dhinaca Sharciga dawladda Deegaanka Soomaalida.
3) Waxa u dhisaa Guddiga maamulka xeer-ilaalinta kaasi magacaaba, Dalacsiiya, hoos u dhiga shaqadana ka eryi kara dhamaan Xeer-ilaalinta kala duwan ee ka hawlgala qaabdhismeedka xafiiska heerarkiisa kala duwan.
4) Iyada oo aan waxba loo dhimayn Awoodaha Sharciyada kale lagu siiyay Booliska, waxa uu Amraa in Baadhis lagu sameeyo Fal hoos imanaya Awood garsoorka maxkamadaha Deegaanka waxaanu Dabagal ku sameeyaa Hanaanka Baadhista loo samaynayo, warbixin ka gudbiyaa Baadhisyada Socda islamarkaana Amri karaa in la joojiyo Baadhis socotay iyada oo la ilaalinayo Danta shacabka marka ay cadaato inaan baadhista kasoo baxeynin masuuliyad Faldambiyeed waxaanu Xaqiijiyaa in geedisocodka baadhista loo sameeyo hab sharciga waafaqsan isagoo bixin kara talaabooyin iyo tilmaamo sixitaan.
5) Waxaa uu go'aanada xeer-ilaalinta ee faylasha baadhista la socodsiiyaa Booliska iyo Maxkamadaha waxaanu go'aan kama dambays ah kasoo saaraa cabashooyinka (Appeal) ay soo gudbiyaan Boolisku ee ku saabsan Go'aanada Xeer-ilaalinta heerarkeda kala duwan ee faylasha Baadhista ee socda isaga oo talo weydiin kara Booliska.
6) Waxa uu hubiyaa Gungaadhka Baadhista ee ay soo gudbiyaan Boolisku isaga oo go'aamin kara in aan la oogin wax dambi ah marka shuruudaha lagu sheegay habka Xeerka Ciqaabta ay waaafaqsantahay.
7) Waxa uu go'aamiyaa qaadista Qirashada Faldambiyeedka, waxa uu samayn karaa gorgortan la xidhiidha Qirashada iyo talaabooyinka kale ee la qaadan karo waxaanu xaqiijiyaa fulinteeda.
8) Isaga oo matalaya Deegaanka Wuxuu dacwad Ciqaabeed ka furaa, ka doodaa islamarkaana la noqon karaa Xaashida Oogista marka ay lagama maarmaan noqoto sugidda Xaqa iyo Danaha Shacabka Deegaanka isaga oo la tashanaya Madaxweynaha.

9) Waxaa uu xaqiijiyaa fulinta Go'aamada la xidhiidha Faldambiyeedyada ee ay soo saaraan maxkamadahu, waxa uu maxkamadda weydiisan karaa in ay qaado talaabooyin sixitaan Go'aan hore oo ay soo saartay marka aan la fulinin Go'aanadan ama Hanaanka fulintoodu ay ka hor imanayso Sharciga.
10) Waxa uu Hogaamiyaa islamarkaana xaqiijiyaa aasaasida nidaamka fulinta Go'aanada la xidhiidha Faldambiyeedyada.
11) Wuxuu daraasad ku sameeyaa sababaha dhaliya Dambiyada ka dhaca deegaanka isagoo talooyin ka bixinaya Hababka lagaga Hortagi karo laguna yareynkaro.
12) Wuxuu dabagalaa Xadhiga iyo Haynta dadka ku xidhan jeelasha iyo Saldhigyada Boolisku ay waafaqsantahay Sharciga wuxuuna bixiyaa Amaro lagu saxayo Talaabooyinka sharciga baalmarsan islamarkaana waxa uu talaabo ka qaada ama suurtogeliyaa in talaabo laga qaado xubnaha Sharciga ku xadgudba.
13) Waxa uu Madaxweynaha iyo Xeerilaalinta Guud ee federaalka u gudbiyaa Xukunada Dilka ah ee ay Go'amiiyaan maxkamadaha Deegaanku.
14) Waxa uu u taaganyahay islamarkaana matalaa Danaha Dawladda iyo Mida Shacabkaba Waxaanu uu u doodaa, Fuliyaa ama suurtogeliyaa in la fuliyo Heshiisyada kala duwan ee ay Xafiisyada Dawladdu Galaan.
15) Wuxuu qareen ahaan Maxkamadaha Deegaanka uga doodaa isagoo Wakiilka ah Xafiisyada Dawladda deegaanka Dacwadaha Madaniga ah hadii ay wax dacweynayaan iyo Hadii la dacweynayoba, waxaanu xaqiijiyaa in Go'aanada kasoo baxa dacwadahani loo fuliyo hab sharciga waafaqsan,
16) Waxa uu dacwadaha Madaniga ah ee ka socda Maxkamadaha Deegaanka uga doodaa isaga oo metelaya Muwaadiniinta aan haysan kharash ay ku qabsadaan Qareen, gaar ahaan Haweenka, caruurta, Dadka Baahiyaha Gaarka ah leh iyo Dadka Da'da ah.
17) Waxa uu dacwadaha Madaniga ah ee ka socda Maxkamadaha Deegaanka iyo Goobaha dhexdhexaadinta uga doodaa isaga oo metelaya Dhibanayaasha uu dhaawac kasoo gaadhay Faldambiyeedyada si loo sugo magdhawga ka dhalanaya Dambigaas.
18) Waxa uu Diyaariyaa Shuruucda Qabyada ah waxaanu Xaqiijiyaa Shuruucda ay soo diyaariyeen Xafiisyada kala duwan ee dawladdu inay waafaqsan yihiin Dastuurka isaga oo talooyinka sharci ee ku haboona u gudbinaya cida ay khusayso.
19) Waxa uu kala taliyaa Xafiisyada Dawladdu heerarkooda kala duwan marka ay heshiis la gelayaan Cid kale, waxaanu ka qaybqaataa Diyaarinta iyo Gorgortanka intaan Heshiiska la gelin kahor isaga oo xaqiijinaya in la sugo Danaha Dawladda iyo mida Shacabka.
1. Waxa uu qabtaa Daraasadaha la xidhiidha Baahida Dib u habeynta iyo waxkabedelaada sharciyada waxaanu isku habeeyaa islamarkaana isku uruuriyaa dhamaan Shuruucda uu deegaanku soo saaro.
2. Wuxuu xaqiijiyaa Dhaqangelinta Shuruucda kala duwan ee uu soo saaro deegaanku waxaanu Xaqiijiyaa in Xafiisyada Dawladda Deegaanku shaqooyinka habka ay u fulinayaan uu waafaqsanyahay Sharciga.
3. Waxa uu Tabobaro sharci siiyaa Masuuliyiinta Heerarkooda kala duwan, Shaqaalaha Dawladda iyo qaybaha kale ee Bulshada si loo xaqiijiyo Hirgelinta Sarreynta Sharciga.
20) Waxa uu aasaasaa Nidaam lagu ururinayo, lagu horumarinayo islamarkaana lagu lafaguro Nidaamka shaqo ee Caadalad marinta Dambiyada ee Deegaanka.
21) Waxa uu suurtogeliyaa iyo Tabobaro waqtidheer iyo kuwo waqtigaaban la siiyo Xeer-ilaalinta heerarkooda kala duwan si loo kobciyo Xirfada, Garaadka iyo Aqoontooda.
22) Wuxuu Afsoomaali ku Turjumaa Shuruucda ay soo saarto Dawladda Federaalka ee dhaqangalka ku ah Deegaanka.
23) Waxaa uu Diyaariyaa, dhaqangeliyaa Istaraatiijiyada bixinta Adeegga Bilaashka ah ee Qarenimo islamarkaana Maamula Xafiiyada iyo cidkasta oo adeegan bixisa.

24) Isaga oo tixraacaya Qorshaha Heer qaran ee Xuquuqda Aaadamaha Waxa uu diyaariyaa Qorshaha Xuquuqda aadamaha ee Deegaanka waxaanu isku xidhaa dhamaan waaxyaha dawladda ee qaybta ka ah Qorshahan waxaanu ururiyaa una gudbiyaa cida ay khusayso Warbixinta la xidhiidha Qorshahan.
25) Waxa uu qabtaa Tabobarada iyo Wacyigelinada ku saaabsan Ilaalinta Xuquuqda Aadamaha waxaanu dusha ka maamulaa dhamaan Ururada iyo hay'adaha deegaanka ku sugan ee ka shaqeeya Arrimahan.
26) Wuxuu shatiga Qareenimo siiyaa, Dabagalaa islamarkaana u cusboonaysiiyaa kalana noqdaa Qareenada ka dooda heerarka kala duwan ee maxkamadaha Deegaanka.
27) Wuxuu Diiwaangeliyaa Heshiisyada iyo Caddeymaha ka dhaca Deegaanka dhexdiisa waxaanu Xaqiijya in ay waafaqsanyihiin Shuruurcda la xidhiidha.
28) Wuxuu Diiwaangeliyaa, Shahaado siiyaa Dabagalaa u cusboonaysiiyaa kana joojin karaa shaqada Ururada rayidka ah ee ka hawlgala deegaanka.
29) waxaa uu dib u eegis ku sameeyaa dhamaan Go'aamana la xidhiidha Dacwadaha iyo faylasha Baadhista ee ay soo saaraan Xeer-ilaalinta Heerarkooda kala duwan waxaanu xaqiijin in go'aanadani ay sharciga waafaqsanyihiin isaga oo bixinayo talaabooyin sixitaan hadii ay cadaato in loo baahdona waxa uu talaabo anshax ka qaadi cida ku kacda Fal baalmarsan anshaxa shaqo.
30) Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.
31) Waxa kale oo uu qabtaa Shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo Ujeedooyinka loo aasaasay xafiiska.

**24. Awooda iyo Waajibaadka Xafiiska Biyaha**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha iyo waajibaadka lagu siiyay sharciyada kale, Xafiiska biyahu waxuu yeelanayaa Awoodahan iyo Waajibaadyadan:

1. Isaga oo siyaasadaha iyo isteraatiijiyadaha la hal maala khayraadka biyaha ee federaaka ku dheeli tiraya xaaladaha deegaanka ayuu suuro geliyaa in la diyaariyo siyaasadaha iyo istaraatiijiyadaha Biyaha ee Deegaanka.
2. Waxa uu diyaarinayaa qorshaha iyo siyaasada xilliga dheer, xilliga dhexe iyo xilliga dhow ee fidinta hawlaha horumarinta khayraadka biyaha ee deegaanka. marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
3. waxa uu hirgeliyaa shaybaadhka guud ee Deegaanka kaasi oo lagu baadhayo tayada iyo fayadhawrka biyaha cabitaanka loo isticmaalo ee Deegaanka waxaanu xaqiijiyaa in loo dhamaystiro qalabka iyo xirfadleyaasha uu u baahanyahay.
4. Isagoo samaynaya Daraasad lagu ogaanayo Kaydka Khayraadka Biyaha ee Deegaanka ayuu ururiyaa xogaha la halmaala biyaha, wuu habeeyaa , wuxuuna ka suurtogeliyaa sidii looga faa'iideysan lahaa.
5. Waxa uu sameeyaa daraasaadka iyo naqshadaha ee loo adeegsanayo Mashaariicda biyaha cabitaanka; wuxuuna dabagal ku sameeyaa dhismeyaasha la xidhiidha adeegga biyaha;
6. Waxa uu xaqiijiyaa in khayraadka biyaha loo qaybiyo lana gaadhsiiyo dhacabka Deegaanka loona isticmaalo qaab miisaaman oo caddaalad ah.
7. Waxa uu soocayaa nooca iyo derejeda shaqooyinka biyaha ee u baahan shatiyada fasaxa, Shaqsiyaadka ama shirkadaha shaqooyinkan ku hawlan shaqooyinkan ayuu siinaya shatiga heerka derejeda iyo fasaxay shaqada, wuxuuna ku daba galayaa hab sami u socodka shaqooyinkooda.
8. Isaga oo kaashanayo hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee ay khusayso, ayuu suuro gelinayaa inay bulshadu ka qayb qaataan dhismaha iyo dayactirka xarumaha biyaha;
9. Si xarumaha biyuhu u noqdaan ku leh jiritaan joogtaysan ayaa waxa uu tababar iyo taakulaynba siinaya gudiyada biyaha iyo qaybaha bulshada ee ay khusayso;
10. Isaga oo kaashanayo isticmaalayaasha iyo xafiisyada ay khusayso ayuu dabagal ku samaynayaa nabad qabka khayraadka iyo shirkadaha hawlaha biyaha; wuxuuna suuro gelinayaa in kuwa u baahan dayactirka in dayactir loo sameeyo;
11. Waxa uu dabagal ku samaynayaa in khayraadka biyuhu yahay mid ay nadaafadiisu sugan tahay, wuxuuna dabagal ku samaynayaa waxyaabaha wasakheeya khayraadka biyaha, isaga oo illaha ay wasakhdaasi ka

timaad daraasad ku samaynaya ayuu suuro geliyaa in la tirtiro, isaga oo la kaashanayo cida ay khusayso ayuu suuro geliyaa in laga qaado tallaabo sharci iyo mid farsamo intaba;

12. Waxa uu suuro geliyaa in lagu shaqeeyo tignoolojiyada casriga ah oo waxtar u leh koboca khayraadka biyaha;
13. Waxa uu daraasad ka sameeyaa tacriifta qiimaha ku haboon adeega biyaha, wuxuuna go'aamiyaa waxaanu dabogal ku sameeyaa hab sami u ururinta iyo kahortagga in la lunsado;
14. Waxyaabaha la halmaala  shaqooyinka biyaha ayuu u fidiyaan adeega sheybaadhka; wuxuuna ka qaadaa kharash u dhigma qiimaha adeega;
15. Si loo ilaaliyo khayraadka fayadhawrka biyaha loona horumariyo ayuu xubnaha ay khusayso ee heer federaal iyo Heer deegaanba la yeelanayaa wada shaqayn iyo xidhiidh wadashaqeyneed oo dhaw.
16. Waxa uu hadba sidii loo baahdo u ururinayaa xogaha saadaasha hawada ee waxtarka u leh horumarinta khayraadka Biyaha.
17. Waxa kale oo uu qabtaa Shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo Ujeedooyinka loo aasaasay xafiiska.
18. Waa mulkiile Hanti, waa la dacweynkaraa magaciisana waxbuu ku dacweyn karaa.

**25. Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Tacliinta, Xirfadaha, Farsamada iyo Sayniska**

Iyada oo ay sideeda tahay awoodaha iyo waajibaadyada lagu siiyey sharciyada kale, Xafiiska Tacliinta, Xirfadaha, Farsamada iyo Sayniska waxaa uu yeelanayaa awoodahan iyo waajibaadyadan

1. Isaga oo tixraacaya istiraatiijiyada tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee dalka, waxa uu diyaarinayaa istaraatijiyada qorshayaasha iyo yoolasha tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee deegaanka marka loo ansixiyana wuu dhaqan galinyaaa.
2. Waxa uu maamulayaa xarumaha tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee deegaanka, waxaanu dabogal ku samaynayaa inay bixinayaan Tacliin tayo sare leh
3. Waxa uu hormuud kanoqdaa in kulliyadaha tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee deegaanka xidhiidh waayo aragnimo iyo iskaashi ula yeelan lahaayeen kulliyadaha dhigooda ah ee dalka  iyo dibada ka jira.
4. Waxa uu abuuraa jawiga ku haboon si maalqabeenada iyo ganacsatada deegaanku uga qaybqaadan lahaayeen hawsha horumarinta kulliyadaha deegaanka islamarkaana uga faaidaysan lahaayeen hal abuurka iyo cududa xirfadlayaal ee ay soo saaraan kulliyaduhu.
5. Waxa uu xaqiijiyaa in golayaasha maamulka kulliyadaha la dhiso islamarkaana shaqooyinka loo igmadayna ay gutaan waxaanu soo jeediyaa talaabooyinka sixitaan  haddii loo baahdo
6. Waxa uu soo jeediyaa magacaabista hormuudka iyo hormuud kuxigeenada kulliyadaha deegaanka waxaanu isagoo raacinaya talobixintiisa u gudbinayaa xafiiska Madaxweynaha si loo magaacabo sidoo kale , wuxuu ka joojiyaa  shaqada hadii ay ku sifoobaan karti dari iyo anshax xumo isagoo go,aan kaasi u gudbinayana xafiiska madaxweynaha.
7. Isagoo la kaashanaya cidaha ay khusayso waxa uu suurto galinayaa in xarumaha tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee deegaanka ay noqdaan kuwo taageera shirkadaha yar yar islamarkaana gudbiya technologiyada casriga ah iyo Curinta iyagoo ku salaynaya daraasada baahida suuqa.
8. Waxa uu aas aasayaa islamarkaana xoojinayaa xarumaha xogaha sayniska iyo farsamada casriga ah.
9. Waxa uu horseed ka noqonayaa abaabulka wacyigalinta iyo hawlgalinta aragtiyada horumarineed ee kudhisan nidaamka tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska.
10. Waxa uu shatiga siiyaa xarumaha tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee gaarka  loo leeyahay waxaanu dabagal ku sameeyaa habsami u socodka shaqooyinka waxbarasho waxaanu kala noqonkaraa shatiga isagoo raacaya sharciyada dhaqangalka ah
11. Waxaa u soo saarayaa  awaamiir lagu hogaaminayo aqoonsina lagu siiyo xarumaha Tacliinta Xirfadaha Farsamada Iyo Sayniska ee dawlada wuxuuna dabagal ku samaynayaa habka fulintiisa

12. Waxa uu soo saaraa islamarkaasna dabagal ku sameeyaa nidaamka xaqiijinta tayada xirfadaha iyo xirfadleyaasha.
13. Waxa uu suuro galinayaa qaabka ay hantilayaasha gaarka ah uga qaybqaadan karaan hawlaha horumarinta tacliinta xirfadaha iyo farsamo.
14. Waxa uu fidinayaa nidaam gaar ah oo suuro galiya sidii ay tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee haweenka iyo dadka laxaadka waxka qabaa uga heli lahaayeen fursado gaar ah iyo dhamaan waxkaqabadka arrimaha dhextaalka.
15. Isagoo la kaashanaya xafiisyada dawlada, ganacsatada deegaanka iyo haayadaha kala duwan waxa uu suurto galinyaa in ardayda waxka baratay kulliyadaha deegaanka ay iskood isku abaabulaan samaystaana xarumo waxsoo saar Ganacsi iyo mid shaqo abuur.
16. Waxa uu samaynayaa cilmi- baadhis laxidhiidha dhinaca tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska islamarkaana taakulaynayaa kuwa kashaqaynaya cilmibaadhista qaybtan.
17. Waxa uu soo saaraa, dhaqangalinayaana awaamiirta fullinta layliga shaqada iyo habraacyada nidaamka tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska
18. Wuxu dhisaa dabagalaa islamarkaana xaqiijiyaa qorshayaasha iyo hawlaha xarunta xaqiijinta tayada xirfadlayaasha
19. Waxa uu samaynayaa daraasadda baahida suuqa kahor tabobarada iyo kadib daraasaadka raad raaca tabobartayaasha oo lagu xaqiijin karo natiijada lagahelayo ama laga helay tababarada.
20. Isaga oo ka duulayaa istaraatijiyada horumarineed ee deegaanka ayuu soo saarayaa heerka darajo ee tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee deegaanka
21. Waxa uu soo saarayaa islamarkaasna dhaqangalinayaa awaamiir fullineed oo lagu habeeyo barnaamijyada , manhajyada iyo agabyada baris-barasho ee hoose iyo dhexe ee tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska
22. Waxa uu aqoonsi siiyaa xarumaha tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska ee kajira deegaanka gudihiisa, wuxuuna xaqiijinayaa inay ku suganyihiin heerarka iyo darajada loo dajiyey haddii ay noqdaan kuwa ka hooseeya heerla darajo ee loo dajiyeyna waxa uu dib ugala noqdaa shatiga aqoonsiga ee uu siiyey.
23. Waxa uu aqoonsi siinayaa xarumaha kulliyadaha iyo haayadaha iyagu bixiya imtixaanka lagu xaqiijiyo kartida xirfadeed.
24. Waxa uu curiyaa fikirka siyaasadeed ee kuwajahan tacliinta xirfadaha farsamada iyo sayniska. Isagoo ka duulayo kobaca dhaqaale ee deegaankuna soo jeediyaa fikirkiisa go,aan ee dib uhabaynta loo baahanyahay .
25. Waxa uu suuro galinayaa in deegaanka laga hirgaliyo heer-daboolka tacliinta xirfadaha iyo farsamada oo isku dheelitiran
26. Waxa uu hogaaminayaa sidii xarumaha tacliinta xirfadaha farsamada iyo saynisku u noqonlahaayeen barta looga gudbo farsamada casriga ah
27. Waxa uu soo saaraa nidaam suuro galiya in xarumaha tacliinta xirfadaha iyo farsamadu qabtaan tababaro lagu fulinayo nidaam iskaashi, waxuuna taakulayn iyo dabagal ku sameeyaa dhaqangalkiisa.
28. Waxa uu diyaarinayaa manhajka tababarada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn oo looga duulo baahida iyo rabitaanka suuqyada, wuxuuna suuro galinayaa in lagu hawlgalo
29. Shaqaalaha iyo macalimiinta xafiiska ayuu u suuro galiyaa inay helaana waxabarasho iyo tababaro ay ku kobciyaan awoodooda islmarkaana kusalaysan rabitaanka suuqyada.
30. Waxa uu dajinayaa jiho fullineed oo lagu kobcinayo ilaha dakhli ee Kulliyadaha si ay mustabalka udabooli karto kharashyadeeda.
31. Hab waafaqsan Shuruucda Maamulka maaliyadda ee dhaqangalka ah, Waxa uu go, aaminayaa cadadka kharashka ee laga qaadayo xirfadlayaasha qaadanaya imtixaanka halbeega cabirka heerka kartida xirfadeed oo waafaqsan noocyada Xirfadeed.
32. Si loo helo hanaan waxbarasho oo waafaqsan nidaamka halbeega waxbarasho ee dalka waxa uu iskaashi iyo wada shaqayn joogto ah la yeeshaa Xafiisyada bahwadaagta ah.

33. Wuxuu qabtaa hawlaha ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
34. Waxuu yeelankaraa hanti, heshiisna wuu galikaraa, waana ladacwaynkaraa waxna wuu dacwaynkaraa.

**Qodobka 26^aad Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Shaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada**

Iyada oo ay sidooda yihiin awoodaha lagu siiyay shuruucda kale, Xafiiska Shaqaalaha iyo Arrimaha Bulshadu wuxuu leeyahay Awoodaha iyo waajibaadyadan:

1. Wuxuu Diyaariyaa oo dhaqangeliyaa Shuruucda iyo Siyaasadaha Deegaanka ee la xidhiidha Shaqaalaha.
2. Xafiisku Isaga oo ka duulaya Aragtida Deganaanshaha Shaqo wuxuu Wuxuu Ilaaliyaa Xuquuqda Shaqeeyaha, islamarkaana Taageeri Wada Xaajoodka laba geesoodka ah ee Dhexmara Shaqeeyaha iyo loo Shaqeeyaha.
3. Wuxuu Abuuraa Hanaan dhaxalgal ah oo lagu Xalinayo Muranada soo kala dhex gala Shaqeeyaha iyo loo Shaqeeyaha.
4. Wuxuu soo saaraa Awaamiir Go'aaminaysa Heerarka Caafimaad ee lagu Dhawrayo fayoqabka Shaqaalaha, waxaanu dabagalaa Fulintooda.
5. Waxa uu suuro gelinayaa sidii ay shaqeeyayaasha iyo loo shaqeeyayaashu isugu habayn lahaayeen ururo ahaan, isla markaasna wuxuu taakulayn xirfadeed ka siiyaan sidii ay u ansaxsan lahaayeen heshiis ay u dhan yihiin;
6. Wuxuu ururiyaa, isugeeyaa una gudbiyaa Hay'adaha ay khusayso Xogaha la xidhiidha Shaqadoonka iyo Shaqooyinka Banaan ee Deegaanka, suuqyada iibka, loo shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha, nabadqabka amniga shaqada, sidoo kalana gorfaynaya fursadaha kala duwan ee shaqo ee deegaanka ayuu xogahaas siinaya hay'adaha sharci-dejinta iyo kuwa soo saarida siyaasadaha ee u baahan xogtaas.
7. Wuxuu Cilmi baadhis ku sameeyaa Dhibaatooyinka ay Shaqaaluhu kala kulmaan Shaqo raadinta iyo markay ku guda jiraan hawlaha Shaqo ee Deegaanka.
8. Wuxuu Dabagal ku sameeyaa Habka Shaqaaleysiinta Shirkadaha iyo Ururada Gaarka ah ee Deegaanka.
9. Wuxuu Diwaaangeliyaa ururada Shaqeeyaha iyo loo Shaqeeyeyaasha ee ka jira Deegaanka.
10. Waxa uu xaqiijinayaa in xirfadlayaasha ajnebiga ah ee deegaankeena gudihiisa ka shaqeeyaa haystaan shatiga fasaxa iyo inay cusboonaysiistaan;
11. Wuxuu Diwaaangeliyaa ururada Shaqeeyaha iyo heshiisyada wadajirka ah ee ay la galeen Shirkadaha Macaash raadin ee Dawladda Deegaanku leedahay, waxaanu samayn hawlo baadhiseed oo shaqada la xidhiidha wuxuuna xalin Muranada ka dhex bilaabma Shaqeeyaha iyo Shirkadahan.
12. Isaga oo la xidhiidhaya Xafiisyada ay khusayso, wuxuu fuliyaa Daraasadaha lagu horumarinayo Fayoqabka Muwaadiniinta, Gaar ahaan Hirgelinta Barnaamijyada Gargaarka la siinayo Waayeelka iyo Dadka Laxaadka la' ee Deegaanka si ay si siman wax ula qaybsadaan dadka kale.
13. Wuxuu Suurogelinta iyo Daryeelka lagama maarmaanka ah ay helaan Dadka waayeelka ah, waxaanu dhiirigeliyaa inay ka qaybqaatan horumarka.
14. Waxa uu diyaariyaa, fuliyaa mashaariicda iyo barnaamiyada Ka hortagga Dhibaatooyinka bulsho, waxaanu Adeegyo Dhaqancelin siiyaa dadka ay haystaan dhibaatooyinka Bulshadu.
15. Wuxuu daraasad ku sameeyaa qaabka lagu dhawrayo lagagana hortagayo burburka unuga Qoyska, waxaanu soo jeedin talooyinka ku haboon.
16. Wuxuu qabtaa bandhigyo wacyi-gelin, Siminaaro iyo Tabobaro oo lagu faafinayo muhimada Qoyska iyo kahortaga wixii wax u dhimi kara.
17. Waxa uu fuliyaa Mashaariicda taageerada tooska ah ee shabakada badbaadada waxsoosaarka ee la siinayo dadka aan shaqeysankarin.
18. Isaga oo la kaashanaya Xafiisyada ay khusayso, wuxuu Ka shaqeeyaa ka hortagga Gudbinta Dadka ee Sharci-darrada ah.
19. Waxa uu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
20. Waxa kale oo uu qabtaa Shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo Ujeedooyinka loo aasaasay xafiiska.

21. Wuxuu yeelan karaa Hanti, Heshiisna wuu gelikaraa. Waana la dacweynkaraa waxna wuu dacweyn karaa.

**27. <u>Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Arrimaha Haweenka iyo caruurta</u>**

Iyada oo ay sidooda yihiin awoodaha lagu siiyay shuruucda kale, Xafiiska Arrimaha Haweenka iyo Caruurtu wuxuu leeyahay Awoodaha iyo waajibaadyadan:

1. Isagoo Tixraacaya siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha ku soo baxday xuquuqda haweenka iyo caruurta ee heer federal waxa uu diyaariyaa siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha deegaanka ee ilaalinta xuquuqda haweenka, iyo caruurta, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
2. Waxa uu xaqiijiyaa kaqaybgalka iyo kafaaiidaysiga haweenka iyo caruurta dhinaca siyaasada, arimaha bulshada iyo dhaqaalaha.
3. Waxa uu xaqiijiyaa in fursado loo abuuro haweenka iyo caruurta ay si firfircoon uga qayb qaadan karaa arrimaha siyaasada, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada ee dalka iyo degaankaba.
4. Waxa uu ka caawiyaa haweenka inay iskood isku abaabulaan si ay u ilaalashadaan xuquuqahooda una xalistaan dhibaatoyinkooda
5. wuxuu Dejiyaa jihooyin lagula socdo laguna qiimeeyo diyaarinta siyaasadaha sharciyada barnaamijyada horumarineed iyo mashaariicaha ay fulinayaan laamaha kala duwan ee dawlada deegaanku si loo xaqiijiyo in tix galin ku haboom la siiyey arimaha haweenka iyo caruurta
6. Wuxuu Sameeyaaa daraasado lagu ogaanayo falalka takoorka ah ee saamaynaya haweenka, waxaanu warbixinta u gudbiyaa cidaha ay khusayso islamarkaana abuuraa xaaldaha lagu cidhibtirayo falalkaas dabagalna ku sameeyaa fulintooda.
7. wuxuu Xaqiijiyaa in tix galin ku haboon la siiyey sdii haweenka loogu dooran lahaa boosaska hogaamineed ee xafiiska dawlad deegaanka
8. Wuxuu isku xidhaa Xafiisyada dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ee ka shaqeeya horumarinta iyo daryeelka haweenka iyo caruurta waxaanu xaqiijjiyaa in wadajir loo fuliyo.
9. Wuxuu xaqiijiyaa in Deegaanka laga fuliyo Xuquuqaha iyo daryeelka Haweenka iyo Caruurta ay u xeeriyeen heshiisyada Caalamiga ah ee dalku saxeexay iyo kuwa Dastuurka lagu xeeriyay.
10. Wuxuu diyaariyaa isla markaana hirgaliyaa barnaamijyada kor loogu qaadayo Daryeelka iyo haweenka iyo caruurta deegaanka
11. Wuxuu suurtogeliyaa in haweenka iyo caruurta loo abuuro qorshayaal iyo mashaariic ilo dakhli, shaqo abuur iyo Horumarin loogu samaynayo.
12. Wuxuu diyaariyaa qorsho- hawleedyada horumarinta haweenka iyo caruurta deegaanka una gudbiyaa golaha fulinta, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
13. Wuxuu xaqiijiyaa sinaanta jinsi ee fursadaha shaqo, Waxbarasho iyo adeegyada kala duwan ee bulshada.
14. Wuxuu dabagal ku sameeyaa barnaamijyada daryeelka haweenka, iyo caruurta deegaanka ee ay wadaaan ururada iyo hay,adaha kala duwan
15. Isagoo la shaqaynaya xafiisyada ay khusayso wuxuu suurta galiyaa in iskaashatooyinka haweenka iyo caruurta la siiyo dayn iyo deeq ay ku horumariyaan noloshooda kagana bixi karaan saboolnimada
16. Waxa uusuurta galiyaa in caruurta nugul iyo kuwa aan daryeelkii waalidka haysan ay helaan daryeel, xanaano iyo barbarin fiican.
17. Waxa uu dhisaa awoodoodana kobciyaa baarlamaanka caruurta si kaqaybgalka caruurta kor loogu qaado
18. Waxa uu dhisaa xarumaha madadaalada caruurta waxaanu suurta galiyaa in caruurta helaan taageero maskaxeed iyo mid awoodeed si ay mustaqbalka u maareeyaan noloshooda.
19. Waxa uu isku duwaa suurtana galiyaa in adeegyada ay bixiyaan bahwadaagtu noqdaan kuwo ay ka faa,iidaysan karaan haweenka iyo caruurtu.

20. Waxaa uu sameeyaa daraasado iyo cilmibaadhisyo lagu ogaanayo dhibaatooyinka haysta haweenka iyo caruurta iyo gol daloolada kajira adeeg bixinta xuquuqaha haweenka iyo caruurta dhinacyada siyaasada, arimaha bulshada iyo dhaqaalaha.
21. Waxaa suurta galiyaa nidaamka kahortaga iyo jawaabcelinta dayacnaanta, xadgudubka iyo kushaqaysiga caruurta.
22. Wuxuu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
23. Wuxuu yeelan karaa hanti, heshiishna, wuu gali karaa waxna wuu dacwayn karaa.

**28 <u>Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Dhaqanka iyo Dalxiiska</u>**

Iyada oo ay sidooda yihiin awoodaha lagu siiyay shuruucda kale, Xafiiska Dhaqanka iyo Dalxiisku wuxuu leeyahay Awoodaha iyo waajibaadyadan:

1. Wuxuu curiyaa Siyaasadda iyo istaraatiijiyada Horumarinta Dhaqanka ee Deegaanka, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
2. Wuxuu dhiiri-geliya horumarinta iyo fidnta dhaqanka, fanka, farshaxanka iyo hibada hal-abuurka.
3. Wuxuu taageero ku siiya cid kasta oo gacanta ku haysa Ataarta Deegaanku leeyahay hadday tahay shakhsi urur ama hay’ad Diini ah ama xafiis in ay sida ugu haboon ugu xafi-dan.
4. Wuxuu diiwaan galiyaa oo uu xafidaa dhaqanka iyo taariikhda bulshada Deegaanka Soomaalida.
5. Wuxuu suuragaliyaa in deegaanka gudihiisa laga dhaqan galiyo himilooyinka horumartinta dhaqanka iyo dalxiisku.
6. Wuxuu ka shaqeeyaa sidii ay u faafi lahaayeen una kori lahaayeen maktabadaha dadweynaha, xusuus dhawryada iyo matxafyada, islamarkaana xoojiyaa kuwii sii jirey.
7. Wuxuu daraasad ku sameeynayaa lahjadaha ama afafka deegaanka si loogu adeegsado cilmiga iyo shaqada, wuxuuna ka shaqayn sidii uu horay ugu marin lahaa una faafin lahaa suugaantooda.
8. Wuxuu abuuraa xaalad lagu heli karo alaabada iyo qalabka fanka isagoo iskaashi layeelanaya hay’addaha ay khusayso ee Dawladda Deegaanka.
9. Wuxuu ka shaqeeyaa faafinta Tiyaatarada iyo shaneemoyinka, islamarkana xoojiya kuwii sii jirey.
10. Isagoo raacaya awaamiirta ka soo baxda wasaarada dhaqanka ee Dawlada federaalka, wuxuu raadiyaa Aataarta dhaqanka sidii loo heli lahaa,wuxuuna diiwaan geliyaa xogta Aataarta iyo dhaqamada kale ee sii lumaya.
11. Wuxuu aasaasaa Golaha tashiga dhaqanka ee Deegaanka
12. Wuxuu siin dhiiri gelin iyo taageero fidinta adeegyada dalxiis ee deegaanka, isagoo raacaya siyaasada dalxiiska
13. Wuxuu kormeera heerka soo jiidasho hay’adaha dal-xiiska iyo fidinta alaabta ay ka ganacsadaan
14. Wuxuu fasax siiya maal-geliyeyaasha gudaha ee ku hawlan aasaasida hawlaha adeega dalxiiska ee deegaanka, islamarkana daba galayaa.
15. Wuxuu daraasad ku samayaa dalxiiska deegaanka, xogta u helana intuu isku dubarido ayuu u baahiyaa meelaha ay khusayso
16. Wuxuu diiwaan-geliyaa goobaha iyo waxyaalaha soo jiidan kara dalxiiseyasha ee deegaanka, kana shaqeeyaa sidii loo darsi lahaa, loo fahmi lahaa islamarkaana loo daryeeli lahaa
17. Wuxuu derajooyinka siiyaa Huteelada iyo qaybaha kale ee ka shaqeeya adeegga dalxiiska.
18. Waxa uu xog ahaan u ururiyaa una xafidaa qoraalada kala duwan, sawirada, filimada iyo dhokumentariyada dhaqanka ee loo adeegsan karo soo jiidashada dalxiiska waxaanu suurtogeliyaa in shaqooyinkan ay ka qaybqaataan ganacsatada gaarka ah.
19. Waxa uu dhiirigelin u sameeyaa farshaxanlayaasha deegaanka, waxaanu xaqiijiyaa in hanaanka soo bandhigista sawiradu ay ka tarjumayso dhaqanka iyo jiritaanka Soomaalinimo ee shacabka.

20. Waxa uu ka shaqeeyaa horumarinta, cilmibaadhisyada iyo kor u qaadista Luuqada Soomaaliga deegaanka dhexdiisa.
21. Waxa uu aasaasaa, taageero siiyaa islamarkaana suurtogeliyaa in ay abuuraan ilo dakhlli oo u gaar ah Kooxaha fanka iyo suugaanta ee Deegaanka.
22. Wuxuu isku dubaridi arrimaha dalxiiska ee deegaanka isago iskaashi iyo xidhiidh la yeelanaya hay'addaha ay khusayso ee maamulka deegaanka iyo kuwa aan dawliga ahaynba
23. Waa mulkiile hanti, wuxuu galaa heshiisyo magaciisa ayuu wax ku dacweyn karaa laguna dacweyn karaa.

**29:- <u>Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Maaraynta Khatarta-Masiibooyinka</u>**

Iyada oo ay sidooda yihiin awoodaha lagu siiyay shuruucda kale, Xafiiska Maaraynta Khatarta-Masiibooyinku wuxuu leeyahay Awoodaha iyo waajibaadyadan:

1. Waxa uu diyaarisaa siyaasada iyo Qorshaha isteraatiijiga ah ee xilliga dheer, xilliga dhexe iyo xilliga Gaaban ee lagu horumarin karo laguna fidin karo hawlaha ka hortaga iyo udiyaar garaowga masiibooyinka dabciga ah ee deegaanka,
2. Wuxuu Hogaamiyaa, isku xidhaa islamarkaana hogaamiyaa dhamaan Hay'adaha iyo Xafiisyada dawladda ee ka shaqeeya kahortagga iyo u diyaargarowga masiibooyinka.
3. Wuxuu dejiyaa xeeladaha lagaga hortagayo iyo tabaha deegaan ee u diyaar garowga masiibooyinka, marka la ansiiyana meel marintiisa dabagalaa.
4. Wuxuu hindisa xeeladaha lagaga hortagayo masiibooyinka mustaqbalka, isagoo ka anba-qaada.ya waayo aragnimadiilags helay masiibooyinkii hore u dhacay.
5. Isagoo la kaashanaya laamaha ay khusayso ayuu darsayaa waxyaalaha sababa masiibooyinka. isla markaana fidiyaa nidaamka digniinta deg-dega ah.
6. Iyadoo lala kaashanayo laamaha ay khusayso wuxuu sheegaa baaxada ay leedahay masiibadu, raaciyaana tallaabooyinka ku habboon ee is qaadayo, waxa kalo oo uu si rasmi ah ugu dhawaaqaa aagaga masiibadu ku habsatay.
7. Isagoo raacaya awaamiirta Dawladdu u soo saartay ayuu waydiisan dawidda dhexe, ilaha kale ee gudaha iyo Hay'addaha aan dawliga ahayn ee ka hawl-gala deegaanka taakuleyn, islamarkaana Guddoomi wixii taageero iyo deeq ah ee la halmaala.
8. Wuxuu diiwaan-geliyaa, isla markaana u qaybiyaa dadka tabaaleysan dhammaan deeqaha laga helo gudaha iyo dibadaba.
9. Waxaanu qiimayn iyo dabagal ku samaynayaa qorshe hawleedka jawaabcelinta masiibooyinka, kormeeraana mashaariicaha ay fuliyaan hay'adaha kala duwan islamarkaana u gudbiyaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu saxayo galdaloolooyinkooda..
10. Isagoo adeegsanaya warbaahinta dalka, ayuu dadka la socodsiiyaa noocyada, xaddiga iyo qaabka loo isticmaalay deeqaha laga helay dibada iyo gudahaba.
11. Isagoo la kaashanaya hay' addaha ay khusayso ayuu dib u dajiyaa dadka masiibooyinku asiibeen.
12. Wuxuu oggolaansho siiyaa, iskuna dubaridaa, isla markaana kormeeraa hawlaha samafalka iyo horumarinta ee Hay'addaha kaalmooyinka bixiyaa ay wadaan, kana warbixiyaa waxqabadkooda.
13. Wuxuu diyaariyaa xeerarka iyo awaamiirta ku wajahan nidaamka dabagalka iyo abaabulka hay'addaha wadaniga ah ee ku hawlan, isla markaana raba may ka qaybqaataan barnaamiijyada ho-rumarinta iyo la dagaalanka saboolnimada.
14. Wuxuu abuuraa xaaladaha ku habboon sidii deegaanku u gaadhi lahaa isku filaansho xaga cuntada. Kaalmooyinka caawimo ee Bulshada loo qaybinayo ayuu ku meel marin karaa qaab iskaa wax u qabso ah. Waa mulkiile hanti, wuxuu galaa heshiisyo, magaciisa wax buu ku dacwayn karaa, sidoo kale isna waa la dacwayn karaa.

15. Wuxuu qaban karaa waajibaad kasta oo door ka qaadan karaa ka midho dhalinta ujeeddooyinkiisa.
16. Waxa uu isku dubaridaa xogaha ku saabsan tirada qoysaska ku nool deegaanka ee u baahan in ay helaan gar gaar cunto sanadkasta iyo goobaha ay kala joogaan ee deeganka;
17. Waxa uu hay'adaha ay khusayso ee federaalka iskaashi kala yeeshaa hawlaha soo ururinaysaa xogaha saadaalinta hawada ee loo adeegsan karo hawlaha u diyaar garowga masiibooyinka dabiciga ah; waxaanu taakulaynta looga baahan yahay u fidiyaa balaadhnta hawlaha digniinta hore ee laga fulinayo deegaanka;
18. Waxa kale oo uu qabtaa Shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo Ujeedooyinka loo aasaasay xafiiska.
19. Wuxuu yeelan karaa Hanti, Heshiisna wuu gelikaraa. Waana la dacweynkaraa waxna wuu dacweyn karaa.

**30:- Xilka iyo waajibaadka Xafiiska Ganacsiga Iyo Wershadaha.**

iyada oo ay sidooda yihiin awoodaha lagu siiyay shuruucda kale, Xafiiska Ganacsiga iyo Warshaduhu wuxuu leeyahay Awoodaha iyo waajibaadyadan:

1. Waxa uu soo saaraa Istaraatiijiyadaha iyo siyaasadaha horumarinta Ganacsiga iyo Warshadaha marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
2. Waxa uu Diiwaangeliyaa Wakaaladaha Dawladda (Public enterprises) ee loo aasaasay macaash dhalin.
3. Isaga oo Raacaya Sharciyada Diiwaangelinta ganacsiga ee dhaqangalka ah waxa uu aasaasaa Diiwaanka Ganacsatada ee Deegaanka.
4. Waxa uu Diyaariyaa bandhig carweedyada Heer Qaran iyo Caalami ee lagu qabanayo Deegaanka gudihiisa isaga oo dhiirigelinaya waxsoosaarka Deegaanka gudihiisa iyo Horumarinta nidaamka Ganacsi ee Xoolaha nool iyo Beeraha.
5. Isaga oo adeegsanaya Qalab Casriga ah oo tayadiisu sareyso, Waxa uu Shatiga Ganacsi siiyaa, dabogal iyo qiimeyn kusameeyaa islamarkaana kala noqon karaa shatiga Dhamaan dadka ka shaqeeya Ganacsiga Noocyadiisa kala duwan, Adeegyada Gaadiidka iyo Hirgelinta Warshadaha ee Deegaanka dhexdiisa.
6. Wuxuu siiyaa taageerada lagama maarmaanka ah si loo xaqiijiyo in Ganacsatada iyo warshadleyada Deegaanka u dhalatay ay ka tartamaan Suuqyada Dalka iyo kuwa Caalamkaba.
7. Waxa uu diiwaangeliyaa Golaha ganacsatada Deegaanka (Chamber of commerce) iyo ururada ganacsatada noocyadooda kala duwan ee deegaanka laga aasaaso.
8. Isaga oo kala shaqeynaya Wasaaradaha ay khusayso ee Heer federaal waxa uu xaqiijiyaa sidii loo adkaynlahaa Ganacsiga Sharciga waafaqsan ee shacabka ku nool goobaha Xuduudaha ah.
9. isaga oo ka hortegaya Sicir Bararka Waxa uu Xaqiijiyaa in Raashinka iyo Badeecooyinka lagama maarmaanka u ah noloshu ay wada gaadhaan deegaanka islamarkaana lagu iibiyo Qiimaha loo gooyay.
10. Waxa uu fuliyaa shaqooyinka Wakaaladaha Shirkadaha Dawladda loogu wareejinayo Ganacsatada gaarka ah iyo Maalgashadeyaasha kala duwan.
11. Waxa uu dhiirigeliyaa sidii Ganacsatada gaarka ah iyo Dawladdu u wada Maalgashan lahaayeen Ganacsiyada waaweyn iyo Hirgelinta Warshadaha waxsoosaar ee ku haboon.
12. Waxa uu dhiirigeliyaa taageerada lagama maarmaanka ahna siiyaa Iskaashatooyooyinka ku hawlan shaqooyinka Ganacsi ee Deegaanka.
13. Wuxuu Curiyaa islamarkaana soona jeediyaa Mashaariic-Warshadeedyo isaga oo xidhiidh la sameynaya Xafiisyada iyo Wasaaradaha ay khusayo ee Heer Deegaan iyo Heer Federaalba.
14. Waxa uu dhiirigeliyaa Balaadhinta iyo horumarinta Maalgeshiga la xidhiidha Warshadaha iyo Ganacsiga looga gol leeyahay in lagusoo saaro alaabo loo dhoofiyo dalka Dibediisa
15. Isaga oo la kaashanaya Xafiisyada ay khusayso waxa uu Magaalooyinka deegaanka ka aasaasaa Goobaha Warshadaha (Industrial Zones) waxaanu xaqiijiyaa in loo dhamaystiro Kaabeyaasha lagama maarmaanka ah.
16. Waxa uu ku ku dhiirigeliyaa Ganacsatada ku hawlan shaqooyinka ka Ganacsiga Adeeg-bixinta, Beeraha iyo Xooluhu inay maalgeshadaan Warshadaha Waxsoosaarka.

17. Waxa uu taageerada lagama maarmaanka ah siiyaa Doorashada, Isticmaalka Tiknoologiga haboon iyo Talaabooyinka ku dayashada leh ee Xirfadaha Horumarineed si loo dardargeliyo Horumarinta Warshadaha Deegaanka.
18. Waxa uu bixiyaa Tabobarada Kobcinta Xirfadaha iyo Cilmi-baadhisyada la xidhiidha si loo ilaaliyo Tartanka iyo Tayada warshadaha, Ganacsiga iyo Gaadiidka Deegaanka Gudihiisa, marka la ansixiyana waxa uu xaqiijiyaa in dhaqangeliyay.
19. Waxa uu sameeyaa Cilmi-baadhisyo lagu ogaanayo baahida Cududa shaqaale ee Warshadaha Deegaanka waxaanu Xaqiijiyaa in la soo saaro cududii ku haboonayd isaga oo la kaashanaya Kuliyadaha waxbarasho ee Deegaanka iyo Dalkaba.
20. Waxa uu Abuuraa nidaam lagu xaqiijinayo in la helo tiro ahaan iyo tayo ahaanba Alaabada ceydhiin ee Warshadaha Deegaanku u baahanyihiin.
21. Isaga oo xidhiidh la sameynaya Xarumaha Maaliyadeed ee Deegaanka iyo Dalkaba waxa uu xaqiijiyaa sidii loo maalgelilahaa soo jeedimaha Warshadaha (proposals), loona buuxin lahaa baahida Cududa iyo Xirfadaha ay u baahanyihiin Warshadaha Deegaanku.
22. Waxa uu isku xidhnaan ka dhex abuuraa Warshadha yaryar, Warshadaxa Dhexe iyo kuwa waaweyn ee Deegaanka waxaanu siiyaa taageerada ay u baahanyihiin si warshadaha yaryar isu bedelaan kuwa dhexe, kuwa dhexena isu bedelaan kuwa waaweyn.
23. Waxa uu abuuraa Diiwaanka Xogta Warshadaha Deegaanka kaasi oo lagu keydiyo Nooca, Goobta ay ku yaaliin iyo xogaha dhamaystiran ee warshadaha deegaanka.
24. Waxa kale oo uu qabtaa Shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo Ujeedooyinka loo aasaasay xafiiska.
25. Wuxuu yeelan karaa Hanti, Heshiisna wuu gelikaraa. Waana la dacweynkaraa waxna wuu dacweyn karaa.

**31aad Xilka iyo Waajibaadka Xafiiska Dakhliga**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha lagu siiyay Sharciyada kale, xafiiska Dakhligu waxa uu yeelaneyaa xilka iyo Waajibaadka hoos ku cad

1) Wuxuu Fulinayaa islamarkaana ilaalinayaa sharciyada iyo Awaamirta canshuurta inay si Habsami ah uga Hirgalaan Deegaanka.
2) Si loo dhaqangeliyo shuruucda Dakhliga iyo Cashuurta waxa uu dabagal, Hantidhawr iyo baadhis ku samayn dhamaan ilaha ay ku waajibtay Cashuurbixintu.
3) Wuxuu Xadaynayaa, ururinayaa dakhliga ay Dawladda Deegaanku cayintay in lasoo ururiyo, Dakhliyada ka dhaxeeya Dawladda Deegaanka iyo Federaalka iyo Dakhliyada Dawladda Federaalku u Wakiilatay Dawladda Deegaanka.
4) Wuxuu balaadhinayaa Aasaaska Cashuurta Deegaanka isaga oo ka duulaya Daraasadka lagu sameeyay Dhaqdhaaqa Dhaqalaaha Deegaanka.
5) Wuxuu Jihayn oo isku dubaridi Barnaamijyada Dib uhabaynta Cashuuraadka lagu sameeyay ee Deegaanka kasocda.
6) wuxuu baadhayaa xog kasta oo shaqsi hayo oo Faa'iido u leh Fulinta Shariyada Cashuurta
7) wuxuu Diyaariinayaa islamarkaana Hirgalinaya Nidaam lagu wacyigalinayo Cashuur bixiyayasha si ay iskood ugu Guutan Waajibaadkooda Xuquuqdoodana u gartaan, sidoo kale si loo abuuro shaqaale karti buuxda u leh maamulka canshuurta

waxay diyaarin Nidaamkii lagu tababarayey korna loogu qaadayay Xirfadaa Shaqaalaha

8) Wuxuu Deegaanka ka Aasaasayaa kana Hirgalinayaa Nidaam Casri ah ee Xadaynta iyo ururinta Cashuurta oo kusalaysan Sharciga, Cadcadaan iyo la Xisaabtan leh. Islamarkaana waxay bixinaysaa Adeeg Hufan, Degdeg ah oo tayo leh waxayna xaqiijinayaa in la Hirgaliyay Waajibaadada Cashuureed.
9) Iyadoon Waxba loo Dhimayn Shuruucda kale ee la Xidhiidha Waxay Xadaynaysaa, Ururinaysaa oo uu taageero farsamo siinaysaa soo xeraynta Dakhliga adeega magaalooyinka.
10) iyadoon waxba loo dhimayn Awaamiirta loo soo Saari doono,wuxuu xadaynayaa, ururinaysaa oo uu taageero farsamo siinaysaa Dakhliga kasoo xerooda Dawladaha Hoose
11) Wuxuu Uruurinayaa iskuna Dubaridayaa Xogaha kala duwan ee looga baahanyahay xadaynta Cashuurta, islamarkaasna u adeegsanayaa in lagu Xadeeyo laguna ururiyo Cashuurta.
12) Isagoo la kaashanaya cidaha ay khusayso, wuxuu Daraasad ku sameeyaa waxkabedelada lagu samaynayo shuruucda Cashuurta ee Deegaanka waxaanu suurtogeliyaa in loo dhaweeyo golaha hawlfulinta, marka la ansixiyona wuu dhaqangeliyaa.
13) Si Cashuur bixiyeyaashu y helaan Adeeg Hufan oo Degdegsiinyo leh waxay diyaarinayaa goobo Cashuurta lagu bixiyo.
14) Waxa uu dejiyaa siyaasadaha iyo tabaha kor loogu qaadi karo Dakhliga Deegaanka.
15) Waxuu xaqiijiyaa in Shuruucda Cashuurta la dhaqangeliyo islamarkaaana loo ururiyo loona maamulo hab sharciga qaafaqsan.
16) Wuxuu qabanayaa Hawlaha kale ee Sharcigu u fasaxay silo Hirgaliyo Xafiiska .
17) wuxuu Yaalankaraa Hanti, Heshiisna way gelikaraa. Waana la dacweynkaraa waxna wuu dacweyn karaa.

**Qodobka 32^aad Xilka Iyo Wajiibaadka Xafiiska maalgelinta iyo Qurbajoogta.**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha lagu siiyay Sharciyada kale, xafiisku Maalgelinta iyo Qurbajoogtu waxa uu yeelaneyaa xilka iyo Waajibaadka hoos ku cad

1. Wuxuu isku dubaridaa islamarkaana Hogaamiyaa dhamaan Arrimaha la Xidhiidha Qurba-Joogta Deegaanka.
2. Wuxuu diyaarin iyagoo Qoraal iyo Muuqaalba isugu jira oo uu gaadhsiin Qurba-joogta Deegaanka dhamaan xogta la xidhiidha Horumarka, Maamulka suubban ee ka hanaqaaday Deegaanka.
3. Xafiisku isaga oo la Xidhiidhaysa Xafiisyada Liisan bixineed waxa uu u fududeeyaa Qurba-Joogtu sidii ay adeeg Degdeg ah u lahaayeen.
4. Isaga oo la xidhiidhaya Xafiisyada ay Khusayso Wuxuu Qurbajoogta Deegaanka u Fududeeyaa inay helaan "Kaadhka Aqoonsiga ee Qurba-joogta u dhalatay Dalka".
5. Wuxuu daraasad ku sameeyaa Dhibaatooyinka iyo caqabadaha waaweyn ee ay kala kulmaan hawlaha Maalgelinta Deegaanka Qurba-joogta.
6. Waxay Madaxweynaha kala talisaa Arrimaha Qurba-joogta.
7. Wuxuu sameeyaa hawlo Abaabul iyo Wacyi-gelin oo lagaga hortagayo fikirada xunxun ee ku liddiga ah Nabad-gelyada, Horumarka iyo Maamulka suuban inay ku faafaan Qurba-Joogta Deegaanka.
8. Wuxuu Kobcin islamarkaana dhisi Ururada Deegaanka gudihiisa iyo debedaba ka dhisan ee kaalinta hore kaga jira Hawlaha wacyi-gelinta iyo Baraarujinta Qurba-Joogta.
9. Isaga oo la Xidhiidhaya Xafiisyada ay khusayso waxa uu sahlaa sidii Qurba-Joogta Deegaanka u dhalatay loogu Diyaarin lahaa Dhul iyo Khayraadada kale ee Maalgelinta ku haboon.
10. Wuxuu Diyaariyaa Qorshayaal iyo Fursado ay Qurba-Joogta Deegaanka u dhalatay kaga qaybqaadanayaan Horumarka iyo Nabadgelyada Deegaanka islamarkaana kusoo jiitaan Maalgeliyeyaasha caalamiga ah.
11. Marka lasoo gudbiyo codsi maalgalineed inta uu hab sharciga waafaqsan uga baaran dago ayuu bixiyaa fasaxa, cusboonaysiinta ama siduu sharcigu farayo asagoo raacaya ka joojiyaa hadii uu u arko kuwo ku sifoobay khaladada sarci
12. Waxa uu fidayaa oo uu dhiirigaliyaa dhaqdhaqaaqyada maalgalinta ee ka socoda deegaanka gudihiisa
13. Wuxuu soo saarayaa xaalado deegaanka maalgalin loogu abuuro awaamiir iyo talabooyin lagu fuliyo isagoo hay'ada fulinta u gudbinaya.
14. Wuxuu ururiyaa xogaha , khayraadka hantida iyo fursadaha maalgalinta oo uuu soo bandhigaa islamarkaana uu diyaariyaa mashaariicda maalgalineed

15. Wuxuu diyaariyaa daraasaadyada mashaarcyaha kala duwan, wuxuna dhaqangaliya, sidoo kalena uu la taliyaa maalgaliyayaasha dhaqangalinoodana dabagal uu ku sameeyaa.
16. Wuxuu xidhiidh iyo iskaashi guud ka dhex abuuraa hantiilayaasha, xubnaha dawlada iyo xubnaha kale ee saamaynta ku leh koboca maalgalinta.
17. Wuxuu sameeyaa bandhigaa, tababaro iyo siminaaro wax katarayaa sidii maalgalinta degaanka loo dhiiri galin lahaa.
18. Wuxuu diyaariyaa, fuliyaa, qoraalada warbxinada iyo aflaanta loo adeegsado fulinta maalgalinta
19. Wuxuu dabagalaa mashaariicda fasaxa maalgalinta la siiyay islamarkaana xaqiijiyaa in xuquuqda iyo waajibaadyada bayaankan lagu siiyay maalgaliyaha ladhawray
20. Waxa uu isaga oo ka duulaysa bayaanka maalgalinta , shuruuda iyo awaamiirta kala duwan ee deegaanka ayuu qabtaa Codsiyada ay maalgaliyayaashu ku doonayaan in canshuur dhaaf logu sameeyo waxyaabaha aay dibada ka keenayaan intay qiimayso warqad taageero ah ugu gudbisaa hay'adaha aay khusayso
21. Shahaadada ayaa intuu baadho codsiyada maalgaliyayaasha wax soosarka bilaabay ku doonayaan in canshuurta dakhliga laga dhafo ka bixinaysaa go'aan islamarkaana ogaysiinaysaa xafiisyada aay khusayso ee dawlada degaanka soomaalida in la dhiiri galiyo maalgaliyayaasha
22. Waxa uu isga oo hay'ada fulinta dawlada degaanka iyo gudiga maalgalinta ogaysiinaysa ayaa fulinaysaa heshiishyada maalgalinta deegaanka lagu dhiirigalinaayo, laguna fidinaayo ee dhinaca sedexaad lala galo.
23. Waxa uu warbixin ku saabsan Dhaqdhaqaaqa maalgalinta degaanka u gudbisaa boordhiga maalgalinta iyo xubnaha kale ee aay khusayso.
24. Waxa uu qiimaysaa marka xafiiska codsi maalgalin dhulka miyiga loo soo gudbiyo waxay hordhigaysaa gudiga maalgalinta si go'aan looga gaadho.
25. Waxa uu fuliy aa hawlaha kale ee shaqooyinka maalgalinta lagu dhiirigalinayo
26. Waxaa uu fuliyaa hawlaha kale ee shaqooyinka maalgalinta lagu dhiirigalinayo
27. Waxa uu go'aan ka gaadhaa mudada maalgaliyaha laga dhaafayo lacagta kirada ah ee dhulka iyadoo ku salaynaysa muhiimada mashruucu u leeyahay bulshada.
28. Waaxaa uu ababula qorbajoogta uu dhalatay deegaanka si ay uu maalgashadan dhuula kooda hoyoo.

29. Waaxaa uu la xidhidh qorbajoojat udhalatay deegaanka kuna waragaliya xaalada deegaanka si ay uga soo baxan kalintooda kuu aad dhinca horumarka kor lagu qadayoo nolosha bulshada deeganka.
30. Wuxuu qabanayaa Hawlaha kale ee Sharcigu u fasaxay silo Hirgaliyo Xafiiska.
31. Wuxuu Yaalankaraa Hanti, Heshiisna way gelikaraa. Waana la dacweynkaraa waxna wuu dacweyn karaa.

**Qobobka 33aad Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Dhalinyarada iyo Ciyaaraha**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha lagu siiyay Sharciyada kale, xafiisku Dhalinyarada iyo Ciyaaruhu waxa uu yeelaneyaa xilka iyo Waajibaadka hoos ku cad

1. Wuxuu deegaanka ka dhaqan-gashaa siyaasadaha dawladda dhexe ee ku wajahan dhalinyarada, isaga oo ka duulaya arrin-tani ayuu yagleela siyaasadaha iyo xeerarka heer deegaan.
2. waxa uu aasaasaa islamarkaana taageerada lagama maanka ah la siiyo federeeshinka Dhalinyarada iyo Ciyaaraha ee Deegaanka.
3. Wuxuu dejiyaa siyaabaha heer deegaan looga abuuri karo cudud dhalinyaro oo leh dareen mas’uuliyadeed oo caafimaad qabta, isla markaana abuuraa xaaladaha ku habboon.
4. Wuxuu dhalinyarada deegaanka siiyaa taageerada ku haboon sidii dhalinyaradu door ka qayb-qaadasho ugu yeelan lahaayeen siddii loo kobcin lahaa nidaamka dimoqraadiga, iyadoo ay sal u yihiin rukunada dastuuriga ah.
5. Waxa uu Deegaanka ku faafiyaa Garoomada kala duwan ee ciyaaraha isagoo xaqiijinaya in loo dhamaystiro baahiyaha aasaasiga ah ee Halbeega loo dhigay.
6. Waxa uu Deegaanka ka hirgeliyaa tartamada joogtada ah ee Ciyaaraha kala duwan waxanu xaqiijiyaa habsami u qabsoomida iyo qabsoomidooda.
7. Waxa uu xaqiijiyaa in Ganacsatada deegaanku ay dhiirigeliyaan kooxaha Ciyaaraha ee Deegaanka loona dhisi lahaa kooxo isku filan oo jiritaan dheer leh.
8. Wuxuu dhiiri-geliyaa sidii dhalinta deegaanku utabo-gelin lahayd, una kobcin lahayd dha-qanada qawmiyadaha iyo shu cuubta Deegaanka iyo Dalkaba
9. Wuxuu xil iska saarayaa sidii ciyaaraha iyo tababarada jidh dhiska loo kobcin lahaa deegaankana loogu faafin lahaa.

10. Wuxuu shatiga fasaxyada siiyaa ururada kooxaha ciyaaraha ee laga aasaso deegaanka Isla Markaana Barnaamijyadooda ayuu isku dubaridaa, kormeerna ku sameeyaa.
11. Wuxuu diyaariyaa tartamada ciyaaraha deegaanka ka dhaca, isla markaana sidii loo diyaarin lahaa ayuu fasaxaa.
12. Wuxuu garsooraa khilaafyada ka dhex abuurma kooxaha ciyaaraha ee ku saabsan tartamada ciyaaraha ee heer deegaan
13. Wuxuu u fududeeyaa, isaga oo la kaashanaya xafiisyada deegaanka ee ay khuseeyso sidii loo heli lahaa qalabka iyo aaladaha cayaaraha.
14. Wuxuu baadhaa diiwaanada xisaabaadka ee kooxaha ciyaaraha ee deegaanka, si uu xaqiijiyo in dakhliyadooda loo adeegsaday ujeeddooyinka kooxaha ciyaaraha oo kaliya.
15. Wuxuu diyaariyaa garoomada ciyaaraha lagu qabto ee deegaanka dhexdiisa, isla markaana diyaarintooda ayuu dhiirigeliyaa.
16. Wuxuu diyaariyaa isagoo la kaashanaya xafiiska caafimaadka ee deegaanka wixii dawooyin iyo qalab ah ee la xidhiidha ciyaaraha.
17. Waxa uu dabagal ku samaynayaa hay'adaha aan dawliga ahayn ee ka hawl-gala dhinaca dhalinyarada iyo Arrimaha bulshada; mashaariicda ay soo gudbiyaan ayuu baadhayaa, ansixinayaa, lana sexeexayaa heshiiskooda;
20. Waxa uu dhalinyarada u dhaqdhaqaajiyaa, u habeeyaa inay noqdaan kuwo leh shaqo abuurid; wuxuuna xidhiidhin ka sameeyaa sidii ay u heli lahaayeen tababaro u suuro geliya inay ka hawlgalaan waaxaha shaqo ee ay danaynayaan, helaana deymo, qalab, boosas lagu shaqeeyo iyo taakulaynaha kale ee ay u baahan yihiin;
21. Kadib marka ay shaqo galaana waxa uu fikirkiisa xalka ka bixinayaa dhibaatooyinka ay la kulmaan;
22. Waxa uu dejinayaa isla markaasna dhaqangelinayaa inuu soo saaro nidaamyo suuro geliya sidii loo abuuri lahaa xooga dhalinyaro caafimaad-qabta oo dareemaya xilkasnimo;
23. Waxa uu taakulaynta iyo dabagalba u fidinayaa sidii siyaasadaha iyo awaamiirta heer dal ee la xidhiidha dhalinyarada inay hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee heererka kala duwani sidii loo baahnaa u hirgeliyeen;
24. Waxa uu dhalinyarada deegaanka u abaabulayaa sidii ay qaab waafaqsan Mabaadii'ida Dastuurka deegaanka kaalinta kaga aaddan uga qaadan lahaayeen

dhinacyada siyaasada, dhaqaalaha, bulshada iyo arrimaha kobcinta dhaqankooda, sidoo kalana kaalin buuxda ku yeeshaan dhismaha dimuqraadiyada iyo maamulka suubban; wuxuuna u dhisayaa qaab u suuro geliya;

25. Waxa uu dejinayaa nidaam dhalinyarada u suuro geliya inay bartaan dhaqankooda iyo qowmiyadooda, wuxuu u abaabulayaa in la xoojiyo Dhaqanka deegaanka, wuxuuna qabanaa shaqooyin dhisa dhaqan toosnaanta dhinaca kastaaba leh ee dhalinyarada;
26. Waxa uu samaynayaa daraasaad iyo cilmi-baadhid bar tilmaameedkoodu yahay dhalinyarada; wixii natiijooyin ah ee laga helaana waxa uu u qaybinayaa dhinacyada doorka ku leh;
27. Waxa uu aasaasayaa sanduuqa horumarinta Ciyaaraha oo xallin kara dhibaatooyinka cadcad ee ka jira dhinaca isboortiga. Faahfaahinta hawshaasna waxaa lagu go'aaminayaa awaamiir loo soo saaro;
28. Waxa uu dabagal ku samaynayaa hay'adaha kala duwan ee iyagu ka shaqeeya arrimaha dhalinyarada iyo shaqooyinka ay qabanayaanba, wuu xidhiidhinayaa, isaga oo qiimaynayana ka qaadaya tallaabooyinka ku haboon sixitaanka;
29. Wuxuu qabanayaa Hawlaha kale ee Sharcigu u fasaxay silo Hirgaliyo Xafiiska.
30. Xafiisku waa mulkiile hanta, wuxuu heshiisyo, wuxuu magaciisa ku soo oogikaraa dacwad.sido kale isagana waa lagu soo oogi karaa.

**Qobobka 34$^{aad}$ Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska Warfaafinta**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Warfaafintu waxa uu yeelaneyaa xilka iyo Waajibaadyadan:

1. Wuxuu hagaa barnaamijyada warbaahinta iyo xidhiidhka dadweynaha deegaanka.
2. Wuxuu hogaamiyaa shaqooyinka xidhiidhka arrimaha dawlada islamarkaana suuro galiya nidaam hufan oo lagu hirgaliyo hawlahaas.
3. Wuxuu go'aamiyaa islamarkaana isku dubo ridaa jihada horumarineed ee xidhiidhka xafiisyada dawlada iyo bulshada ka dhexeeya.
4. Wuxuu meel mariya waajibaadyo lagu xoojinayo awooda fulineed ee shaqaalaha ka hawlgala xafiisyada dawlada ee xidhiidhka arrimaha bulshada iyo hogaaminta jihada iyo nidaamka guud ee ay hawshaasi u baahan tahay.

5. Wuxuu isagoo metalaya af-hayeenka dawlada ururiya xogaha dawlada islamarkaana qaabab kala duwan u faa-fiyaa sidoo kalana wuxuu shaciyaa qoraalada iyo ra'yiga dawladu ka qaadato arrimaha amniga ee heer deegaan iyo heer dalba.
6. Wuxuu isku duba ridaa nidaamka iyo muga ay yeelanayaan barnaamijyada xidhiidhka arrimaha dawladu.
7. Wuxuu tafatira wararka maalin laha ee laga siidaayo warbaahinta deegaanka iyo dalkaba islamarkaana u gudbiya cidda ay khuseyso kadib marka uu oggaado ara'ada bulshada.
8. Wuxuu diyaariya isku duba ridaa fursadaha ay bulshadu ku samayso dood cilmiyeed lagu fahan siinayo ama lagu wacyi galinayo fahamka siyaasadaha iyo mabaadiida dawlada.
9. Wuxuu shacabka deegaanka gaadhisiinyaa una faah-faahi-nayaa shuruucda iyo awaami-irta ka soo baxda Dawladda Deegaanka, Wuxuuna tixgel-iin weyn siin diyaarinta barnaamijyada la xidhiidha hawl-aha horumarinta bulshada.
10. Wuxuu kobcinayaa awooda xubnaha xidhiidhka dadwenaha ee qaabdhismeedka heerarkiisa kala duwan iyo warbaahinta ka shaqeeyo.
11. Wuxuu isku dubaridaa islamarkaana jiheeyaa hawlaha shaqo ee la xidhiidha xidhiidhka dadweynaha xafiisyada dawlada.
12. Wuxuu isku dubaridaa fagaareyaasha lagu qaadaa dhigayo qorsheyaasha iyo siyaasadaha horumarineed ee dalka iyo deegaanka isagoo ka qaybgelinaya shacabka.
13. Wuxuu diyaariyaa islamarkaana baahiyaa xogaha lagu baahinayo websiteyada iyo satelaytka.
14. Wuxuu bixinayaa la talinta daabacaadadaha muuqaal-araga (audio-visual) iyo calaamadaha la xidhiidha ee gudbinaya fariimaha.
15. Wuxuu warbaahinta dalka iyo kuwa dalkaba siinayaa war saxaafadeedyada iyo xogta dawladda waxaana uuna taageero u fidinayaa wakiilada wakaaladaha warbaahinta u jooga deegaanka.
16. Wuxuu bixiyaa fasaxa ogolaanshaha warbaahineed ee ku saabsan ganacsiga deegaanka gudihiisa ka hawlgala islamarkaana waxa uu dabagal ku samaynayaa xarumaha xayaysiista iyo daabacaadaha.
17. Waxa uu dakhliga sharcigu jideeyay ka ururiyaa adeegyada ay bixiyaan xarumaha xayaysiista iyo daabacaadaha.

18. Wuxuu dabagal ku sameeyaa islamarkaana saxaa waxyaabaha marin habaabinta u keenaya shacabka deegaanka ee ay qoraan warbaahinta kala duwan.
19. Waxa uu shacabka gadhsiiya go'aanada iyo warmurtiyeedyada ay soo saarto dawladda deegaanka soomaalidu.
20. Waxau uu ururiyaa ra'yiga dadweynaha eek ala duwan waxaanu u gudbiyaa ha'adaha ay khusayso si ay jawaab uga bixiyaan.
21. Waxa uu diyaariyaa qoraalada iyo muuqaalada kala duwan ee kobcinaya muuqaalka wanaagsan ee deegaanka.
22. Waxa uu darsaa shaqooyinka iyo xogaha ay baahinayaan warbaahinta kala duwan ee ka hawlgasha deegaanka.
23. Waa mulkiile hanti, wuxuu gala heeshiis, waa la dacweyn kara, sido kale isna uu dacwayn kara.

**Qobobka 35aad Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska shidaalka, Macdanta iyo Tamarta**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha lagu siiyay Sharciyada kale, xafiisku Shidaalka, Macdanta iyo Tamartu waxa uu yeelaneyaa xilka iyo Waajibaadyadan:

1. Wuxuu diyaariyaa siyaasada iyo Qorshaha isteraatiijiga ah ee xilliga dheer, xilliga dhexe iyo xilliga Gaaban ee lagu horumarin karo laguna fidin karo macdanta iyo tamarta deegaanka, waxa kaloo ay suuro gelisaa in la diyaariyo Qorshaha loo adeegsanayo hawshaas; waxayna ku samaysaa dib u habayn, waxayna soo saaraysaa awaamiir fulineed oo faahfaahsan;
2. Wuxuu dersaa, ururiyaa, habeeyaa isla markaasna isku dubaridaa xogaha la hal maala macdanta iyo tamarta;
3. Wuxuu dadaal u galaa sidii loo heli lahaa cudud shaqo oo aqoon iyo xirfad u leh kobcinta iyo fidinta macdanta iyo tamarta;
4. Isaga oo siyaasadaha iyo isteraatiijiyada uu macdanta iyo tamarta u dejiyey federaalku la fal gelinaysa xaaladaha dhabta ah ee deegaanka ayay suuro gelisaa dhaqanghelintooda;
5. Wuxuu suuro geliyaa in deegaanka laga horumariyo waxyaabaha u haboon dhismaha, macdanta, quwada laga dhaliyo dabaysha iyo qorraxda, biomass-ka iyo hab isticmaalka noocyada kale ee tamarta;
6. Wuxuu daraasad ka sameeyaa illaha la cusboonaysiiyo iyo kuwa aan la cusboonaysiin ee laga dhaliyo tamarta ee sida xarumaha yaryar ee quwada laga dhaliyo biyaha, biomass,

biogas qiyo xaaladaha kale ee dabka laga dhalin karo; waxayna ka dhigtaan in la fahmo lalana socdo xaaladahaas;

7. Wuxuu bixiyaa shatiga aasaasida xarumaha laga dhaliyo dabka korantada, kuwa laga qaybiyo, soo saarida macdanta dhismaha iyo macdanaha dhaqameedka ah, waxayna ku samaysaa Dabagalka ku haboon;
8. Wuxuu hay'adaha ay khusayso ee federaalka iskaashi kala yeeshaa hawlaha macdanta, wuxuuna taakulaynta looga baahan yahay u fidiyaa hawlaha lagu horumariyo macdanta, biyaha u iyo tamarta ee laga fulinayo deegaanka;
9. Wuxuu soo ururinayaa kuna shaqaynayaa xogaha loo adeegsan karo saadaalinta hawada ee macdanta iyo tamarta;
10. Wuxuu daraasad ku sameeyaa isaga oo adeegsanaya farsamooyinka carsiga ee xooga yar yare e korantada curiyana isla markaana macluumaadkooda ayuu isku dubaridaa
11. Wuxuu diyaariyaa awaamiiraha, habraaca isticmaalka technolojiyadaha yar ya ee tamarta, la socdaana dhaqan galkooda
12. Wuxuu hubiyaa in cidaha ku hawlan soosaarida macdanta u shaqeeyaan hab waafaqsan shuruucda iyo xeerarka macdanta
13. Wuxuu diyaariyaa (dajiyaa) istiraatajiyada horumarinta khayraadka macdanta ee deegaanka
14. Wuxuu meelmariyaa daraasado sahlaya sidii ay deegaanka ugu fidi lahayd horumarinta macdanta iyo tamarta
15. Iyada oo la kaashanayo hay'adaha ay khusayso waxay bixiyaa cusboonaysiiyaa isla markaana kala noqota fasaxyada/ogolaanshaha hawlaha sahaminta, baadhista iyo soosaarista khayraadka macdanta ee loo fulinayo qaab dhaqameedka ama heerarka hoose
16. Isaga oo raacaysa awoodaha sharci ee la siiyey ayay shirkadaha iyo hantiilayaasha dalka oo kaliya siinaysaa shatiga fasaxa raadinta iyo baadhista macdanaha kala duwan; waxayna ka qaadaysaa kharashyada kala duwan ee adeegyada macdanta iyo kuwa niista uiyo dhagaxa (Royalty).
17. Wuxuu qabanayaa Hawlaha kale ee Sharcigu u fasaxay silo Hirgaliyo Xafiiska .
18. Wuxuu Yaalankaraa Hanti, Heshiisna way gelikaraa. Waana la dacweynkaraa waxna wuu dacweyn karaa.

**Qobobka 36$^{aad}$ Xilka Iyo Waajibaadka Xafiiska Ilaalinta deegaanka, Kaymaha iyo Isbedelka cimilada.**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Ilaalinta deegaanka iyo Isbedelka cimiladu wuxuu yeelaneyaa xilka iyo Waajibaadka hoos ku cad:

1. Isagoo ka duulaya siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha ilaalinta Deegaanka iyo isbedelka cimilada ee heer federal waxa uu diyaariyaa siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha ilaalinta Deegaanka iyo isbedelka cimilada, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
2. Wuxuu Xaqiijiyaa in Mabaadii'da iyo ujeedooyinka ilaalinta Deegaanka ee lagu xeeriyay Dastuurka Deegaanka iyo dastuurka Dalkaba laga dhaqangeliyo deegaanka.
3. Waxa uu xidhiidh wada shaqeyneed la sameeyaa Xafiisyada kale ee ay khusayso si loom eel mariyo siyaasadaha iyo qorsheyaasha ilaalinta Deegaanka iyo dib u dhiraynta goobaha ay saamaysay isbedelka cimiladu.
4. Waxa uu baahiyaa qoraalo iyo muqaalo bulshada lagu wacyigelinayo muhiimada ay leedahay ilaalinta Deegaanka iyo dhibaatada ay u keeni karto isbedelka cimiladu.
5. Wuxuu hay'adaha kala duwan kala shaqeeyaa in deeganka lagu beero noocyada kala duwan ee dhirta ee ku haboon fayodhawrka deegaanka.
6. Waxa uu meelmariyaa nidaam lagu qiimaynayo Saamaynta ay Deegaanka ku yeelanayaan Mashaariicda horumarineed ee kala duwan ee ay fuliyaan hay'adaha dawladda iyo shirkadaha gaakra loo leeyahayba.
7. Waxa uu dib eegis ku sameeyaa warbixinta Qiimaynta Saamaynta Deegaanka ee Mashaariicda laga hirgelinayo deegaanka waxaanu go'aanka uu qaato la socodsiiyaa xafiisyada ay khusayo waxaanu dabagalaa hirgelinta natiijada kasoo baxday qiimaynta saamaynta deegaanka.
8. Isagoo la kaashanaya cidaha ay khusayso, waxuu meelmariyaa daraasado lagaga hortegayo Xaalufinta dhirta islamarkaana wuxuu qaadaa talaabooyinka lagu yaraynayo saamaynta isbedelka cimiladu ku yeelan karo Deegaanka.
9. Isagoo la kaashanaya Xafiisyada ay khusayso waxa uu dejiyaa halbeegyada ilaalinta deegaanka waxaanu xaqiijiyaa in laga dhaqangeliyo Deegaanka.
10. Isagoo la kaashanaya Xafiisyada ay khusayso waxa uu fuliyaa shuruucda iyo siyaasadaha lagu xakamaynayo isticmaalka aaladaha khatarta ah, Qashinka, Noolaha la dhalan bedelay, iyo dhoofinta, Xaalufinta Kaymaha iyo dabargoynta dhirta si gaar ah uga baxda deegaanka.

11. Waxaa uu soo saaraa awaamiirta lagu xakamaynayo isticmaalka iyo ka ganacsiga walxaha iyo aaladaha waxyeelada u leh Deegaanka, waxaanu dabagal ku sameeyaa dhaqankooda.
12. Waxaa uu xafiisku ilaaliyaa duurjoogta, hoygooda iyo wax soosaarkooda si ayna dabar go’ iyo burbur uuna ugu imaanin duurjoogta iyo hoygooda.
13. Waxaa uu daraasad ku sameeyaa isku-tiirsanaanta noolaha kala gedisan iyo Deegaanka waxaanu talobixin kasoo saaraa saamaynta ay isbedelka cimiladu ku yeelato hab nololeedkooda.
14. Waxa uu fuliyaa mashaariicda Ilaalinta Deegaanka, wuxuuna kala shaqeeyaa xafiisyada ay khuseyso ee deegaanka iyo dalkaba sidii looga hortagi lahaa saamaynta iyo waxyeelada xaalufinta dhirtu ku leedahay carro guurka iyo isbedelka cimilada.
15. Isagoo la kaashanaya cidaha ay khusayso waxa uu soo saaraa nidaam lagu abaalmarinayo shaqsiyaadka iyo hay’adaha ku hawlan horumarinta Deegaanka, sidoo kalena wuxuu ganaaxyo kusoo rogaa cidkasta oo waxyeelo deegaanka soo gaadhsiisa.
16. Waxa uu meelmariyaa nidaam lagu kaydinayo xogta deegaanka iyo Kaymaha ee loo isticmaalo qaab haboon oo waxtarleh.
17. Waxa uu golaha hawlfulinta u gudbiyaa warbixin xiliyaysan oo ku saabsan heerka saamaynta cimiladu ku yeeshay nolosha bulshada, Duurjoogta, Kaymaha iyo khayraadka kaleba.
18. Waxa uu diyaariyaa barnaamijyo wacyigelineed oo kor loogu qaadayo garaadka iyo wacyiga bulshada ee ilaalinta Deegaanka iyo isbedelka cimilada waxaanu isagoo la kaashanaya Xafiiska waxbarashada suurtogeliyaa in barnaamijyadan lagu daro manhajka waxbarashada ee dugsiyada.
19. Waxa uu taageero farsamo iyo mid xirfadeed ee la xidhiidha ilaalinta Deegaanka iyo isbedelka cimilada siiyaa degmooyinka iyo maamulada magaalooyinka.
20. Waxuu dawladda usoo jeediyaa talooyinka iyo talaabooyinka lagu xakamaynayo masiibooyinka dabiiciga ah ee ka dhaca deegaanka dhexdiisa.
21. Wuxuu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
22. Wuxuu Yaalan karaa Hanti, Heshiisna way gelikaraa. Waana la dacweynkaraa waxna wuu dacweyn karaa.

**Qobobka 37aad Xilka iyo waajibadka Xafiiska Waraabka Iyo Dooxooyinka**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Waraabka iyo Dooxooyinku wuxuu yeelaneyaa xilka iyo Waajibaadka hoos ku cad:

1. Waxa uu diyaariyaa siyaasadha iyo istaraatiijiyadaha kafaa'iideysiga waraabka iyo horumarinta dooxooyinka, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
2. Wuxuu suurtogeliyaa diyaarinta naqshadaha iyo daraasadaha Horumarinta waraabka iyo dooxooyinka waxaanu xaqiijiyaa dhaqangelinta ka faa'ideysiga biyaha dooxooyinka ee Deegaanka.
3. Isagoo la kaashanaya Xafiisyada kale ee ay khusayso waxa uu hogaamiyaa mashaariicda horumarinta dooxooyinka deegaanka ee looga faa'iideysanayo Beeraha iyo cabitaanka.
4. Waxa uu diyaariyaa istaraatiijiyada iyo siyaasadda dib u dejinta shacabka reer guuraaga ah iyo mashaariicda ku haboon waxaanu u gudbiyaa golaha hawlfulinta, marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
5. Waxa uu dhaqangeliyaa mashaariicda dib u dejinta ee loo sameynayo Shacabka reerguuraaga ah waxaaxu xaqiijiyaa in loo diyaariyo baahiyaha aasaasiga ah ee nolosha.
6. Isagoo la kaashanaya Xafiisyada ay khusayso waxa uu tabobaro la xidhiidha Beeraha iyo xirfadaha kala duwan xaqiijiyaa in la siiyo shacabka dib u dejinta loo sameeyay si ay u noqdaan kuwo si rasmi ah u dega.
7. waxa uu daraasad ku sameeyaa caqabadaha ay la kulmaan shacabka dib u dejinta loo sameeyo waxaanu xalka u gudbiyaa golaha hawlfulinta marka la ansixiyana wuu dhaqangeliyaa.
8. Waxa uu fuliyaa mashaariicda yoolasha Horumarka ee waara (Sustainable Development Goals) waxaanu dabogal iyo qiimayn ku sameeyaa habsami u socodka mashaariicdan isagoo xaqiijinaya in si baahida shacabka iyo cadaalad ah loo fuliyo.
9. Isagoo la kaashanaya Xafiisyada ay khusayso waxa uu fuliyaa daraasada nidaamka biyo dhaca (watershed) ee Deegaanka waxaanu xaqiijiyaa in mashaariicda horumarinta ee la fulinayaa aanay dhibaato soo gaadhsiin nidaamka ka faa'iideysiga biyaha dooxooyinka iyo waraabka.

10. Waxa uu xaqiijiyaa in mashaariicda maalgelinta ee la ansixiyay ayna dhibaato u geysan nidaamka waraabka iyo beeraha shacabka ee ka faa'ideysta mashaariicda waraabka.
11. Waxa uu dayactir iyo dib u habayn ku sameeyaa mashaariicda waraabka iyo horumarinta dooxooyinka ee la hirgeliyay waxaanu xaqiijiyaa inay noqdaan kuwo waara.
12. Wuxuu dhisaa maamulka mashaariicaha Waraabka (scheme administration) waxaanu siiyaa taageerada farsamo iyo xirfadeed ee ay u baahanyihiin.
13. Waxa uu xaqiijiyaa in qaabka loo diyaariyay, loo hirgeliyay ama looga faa'iideysanayo biyaha dooxooyinku aanau dhibaato u geysan shacabka iyo beeraha.
14. Isagoo la kaashanaya Xafiisyada ay khusayso waxa uu daraasad ku sameeyaa saamaynta ay Deegaanka ku yeelan karaan mashaariicda Horumarinta waraabku iyo horumarinta dooxooyinku.
15. Waxa uu fuliyaa daraasado lagu ogaanayo tayada iyo muga biyaha mara dooxooyinka deegaanka iyo sida loo horumarinkaro waxaanu natiijada u gudbiyaa golaha hawlfulinta.
16. Wuxuu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay Xafiiska.
17. Wuxuu Yaalan karaa Hanti, Heshiisna way gelikaraa. Waana la dacweynkaraa waxna wuu dacweyn karaa.

**Qobobka 38^aad Xilka Iyo Waajibadka Xafiiska Curinta Iyo Tiknoolojiyada.**

Iyadoo ay sideeda tahay Awoodaha lagu siiyay Sharciyada kale, Xafiiska Curinta iyo Tiknoolojiyadu wuxuu yeelaneyaa xilka iyo Waajibaadka hoos ku cad:

1. Wuxuu, isaga oo ka duulaya siyaasadaha, Jihooyinka iyo Istiraatiijiyadda qaran ee hal abuurka Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda diyaariya daraasaadaha iyo barnaamijyada kala duwan ee la xidhiidha Hal-abuurka, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Teknolojiyadda ee degaanka, marka la ansixiyana uu hirgalinayaa;
2. waxa uu qiimeeya baahiyaha kala duwan ee agabka teknolojiyadaha Xafiisyada Dawladda, islamarkaana suurogeliyaa in lasoo iibiyo, marka loo baahdana tirtiraa dhammaan agabka teknolojiyadda

3. Wuxuu diwaangaliyaa, isku dubbaridaa islamarkaana xaqiijiyaa tayada, isticmaalka iyo ka faa'idaysiga agabyada Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo tiknolojiyadda ee laamaha kala duwan ee Dawladda;
4. Wuxuu isku dubbaridaa islamarkaana xaqiijiyaa in dhammaan shaqooyinka Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda ay la jaanqaadayaan baahida tiknoolojiyadeed ee Deegaanka;
5. Wuxuu aasaasaa, hirgaliyaa, xafidaa islamarkaana maamulaa xarumaha kaydinta xogta ee isgaadhsiinta maclumaadka iyo tiknolojiyadda ee Deegaanka, waxaanu xaqiijiyaa in hawlaha Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda ay waafaqsanyihiin halbeegyada Qaranka ee dhinaca Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda;
6. Wuxuu ururiyaa, falanqeeya iskuna habeeyaa xogta la xidhiidha Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda ee Deegaanka, islamarkaana gaadhsiiya cidaha ay khusayso;
7. si loo horumariyo loona tayeeyo cilmi-baadhisyada la xidhiidha Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda Waxaa uu isku xidhaa islamarkaana wada shaqayn ka dhex abuuraa xafiisyada dawladda, Xarumaha Waxbarasho iyo Warshadaha Degaanka ka jira;
8. isaga oo la kaashanaya cidaha ay khusayso wuxuu diyaariyaa islamarkaana dabagal ku sameeyaa horumarinta baahiyaha cududda shaqaale ee wakhtiga gaaban, dhaxe iyo fog ee dhinacyada Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda, Curinta iyo tayaynta kaabahyaasha dhaqaalaha;
9. Wuxuu bixiyaa tababaro lagu kobcinayo aqoonta iyo xirfadda xirfadlayaasha ka hawl-gala xafiisyadda dawladda iyo xarumaha gaarka loo leeyahay ee ku hawlan Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda
10. Wuxuu hirgaliyaa nidaam lagu abaal marinayo shaqsiyaadka ama xarumaha guulo la taaban karo kaso hooyay harumarinta hawlaha Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda;
11. Wuxuu aasaasaa, isku dubbaridaa islamarkaana taageera golayaasha horumarinta Hal-abuurka, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda;

12. Wuxuu hoggaamiya xarumaha ka shaqeeya Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda wuxuuna xaqiijiyaa inay kaalintii looga baahnaa ka gaystaan horumarinta dhaqaale ee Deegaanka;
13. Wuxuu isaga oo wadashaqayn la yeelanaya cidaha ay khusayso suurtagaliyaa in aqoonsi sharci la siiyo Curinta dhinaca Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda ee ay soo saaraan xirfadlayaasha Deegaanka;
14. Wuxuu dhiirigaliyaa ka qayb galka haweenka ee Curinta tiknolojiyadda iyo ka faa'idaysiga Tiknolojiyadaha kala duwan;
15. Wuxuu abaal marin guddoonsiiyaa ardayda kaalmaha hore ka gasha culuumta la xidhiidha Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda, iyo xubnaha hal-abuurka iskood usameeya;
16. Isagoo la kaashanaya cidaha ay khusayso, waxa uu abuuraa jawi ku habboon oo maalgashadayaasha iyo ganacsatada deegaankeena ay kaga qaybqaadanayaan horumarinta Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda;
17. Wuxuu xaqiijiyaa in cilmibaadhisyada la xidhiidha Curinta, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda ee laga samaynayo Deegaanka dhexdiisa inay waafaqsan tahay shuruucda iyo nidaamka u degsan wuxuuna ka qaadi karaa tallaabo sixitaan cidaha ay khusayso;
18. Si loo kobciyo aqoonta iyo waayo aragnimada la xidhiidha Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda, waxa uu iskaashi khibrad wadaag iyo latalinba la yeelan karaa xafiisyada dhiggiisa ah ee Deegaanada kale iyo kuwa heer Federaal;
19. Waxaa uu dhisayaa islamarkaana maamulayaa Xarumo kala duwan oo la xidhiidha hal-abuurka, Isgaadhsiinta Maclumaadka iyo Tiknolojiyadda iyo Xaruunta ka hortagga iyo xakamaynta shucaaca.
20. Wuxuu daraasaad ku sameeyaa Curinta tiknoloji ee hab dhaqameedka ah, wuxuuna suurtagaliyaa in horumarin iyo casriyayn lagu sameeyo;
21. Wuxuu qabtaa shaqooyinka kale ee lagu gaadhayo ujeedooyinka loo aasaasay xafiiska;
22. Waa mulkiile Hanti, magaciisa heshiis ayuu ku gali karaa, waa la dacwayn karaa waxna wuu dacwayn karaa;

**QAYBTA SHANAAD**

**Qodobka 39^aad Xilka iyo Waajibaadka ay ka simanyihiin Madax Xafiiseedyadu**

Iyadoo madaxa xafiisku uu fulinaya awoodaha iyo waajibaadyada xafiiska ee ku xusan Bayaankan, ayuu yeelanayaa awoodahan iyo waajibaadyadan soo socda:-

1. Wuxuu hogaamiyaa dhamaan hawlaha xafiiska loo xilsaaray.
2. Wuxuu maamulaa isla markaana kormeeraa miisaaniyada iyo dakhliyada kala duwan ee xafiiska.
3. Hab waafaqsan Sharciga maamulka shaqaalaha dawlada ayuu shaqaalaha loo baahan yahay ku shaqaaleeyaa, maamulaa, shaqadana kaga eryaa.
4. Wuxuu diyaariyaa qordheyaasha Bilaha ah, Rubuclaha ah iyo Sanadlaha, marka loo ansixiyana dhaqan gelintooda ayuu dabagalaa.
5. Wuxuu diyaariyaa miisaaniyad sanadeedka xafiiska, marka loo ansixiyana wuu dhaqan geliyaa.
6. Wuxuu matalaa xafiiska goob walba iyo xilli kasta, marka uu la macaamilaya cid sedexaad.
7. Wuxuu xafiiska u furaa sanduuq xisaabeed bangi, isla markaana uu dhaq-dhaqaajiyaa.
8. Wuxuu usoo gudbiyaa Xafiisyada ay khusayso warbixinta waxqabadka iyo Qorshaha xafiiska ee rubuclaha iyo sanadlaha ah.
9. Hadba sida ay baahidu tahay ayuu xilka iyo waajibaadka la siiyay ugu wakiilan karaa shaqaalaha xafiiska.
10. Wuxuu fuliyaa shaqooyinka kale ee ay u xilsaaraan Madaxweynaha iyo Golaha Hawl-Fulinta Deegaanku.

**Qodobka 40aad Xilka iyo Waajibaadka Ku xigeenada Madaxa Xafiiska**

Xilka iyo Waajibaadyada ku-xigeenada Madaxa Xafiisku;

1. Waxa uu matalaa madaxa Xafiiska marka uu maqan yahay ama una shaqada gudan Karin.
2. Waxa uu qabtaa hawlaha kale ee uu u xil saaro Madaxa xafiisku.
3. Ku-xigeenku wuxuu Hoostegayaa Madaxa Xafiiska.

## QAYBTA AFRAAD

## QAAB-DHISMEEDKA HEER GOBOL

**Qodobka 41aad Xafiisyada Heer Gobol**

Tiradda Xafiisyada Fulinta ee Gobolka iyo Awoodaha iyo Waajibaadka ay yeelanayaan waxaa lagu Bayaamin Sharci.

## QAYBTA LIXAAD

## QAABDHISMEEDKA FULINTA HEER DEGMO

### Qodobka 42aad Xafiisyada Fulinta ee Degmada

Tiradda Fulinta ee Degmada iyo Awoodaha iyo Waajibaadka ay yeelanayaan Xafiisyada waxaa lagu Bayaamin Sharci

## - QAYBTA LIXAAD

## QAABDHISMEEDKA FULINTA MAAMULKA MAGAALADA

### Qodobka 43aad Xafiisyada fulinta ee Magaalada

Tiradda Xafiisyada Fulinta ee Maamulka Magaaladda iyo Awoodaha iyo Waajibaadka ay yeelanayaan waxaa lagu Bayaamin Sharci.

## QAYBTA TODOBAAD

## QODOBO KALA DUWAN

### Qodobka 44aad Qodobada Kalaguurka

inta lasoo saaarayo Shuruuc qeexaysa Xilka iyo Waajibaadka Xafiisyada Fulinta ee Degmada iyo Maamulka Magaalada waxaa dhaqangal sii ahaanaya Shuruucdii hore u jirtay ee qeexaysay Awoodaha iyo Waajibaadka Maamulada Magaalooyinka.

### Qodobka 45aad Wareejinta Xuquuqaha iyo Awoodaha

1. Dhamaan Awoodihii iyo Waajibaadkii Bayaanka Dib u aasaasida Maalgelinta ee tirsigiisu yahay: 93/2003 lagu siiyay Wakaaladda maalgelinta ee Deegaanka waxaa loo soo wareejiyay Xafiiska Maalgelinta iyo Qurbajoogta ee lagu aasaasay bayaankan.
2. Dhamaan Awoodihii iyo Waajibaadkii la xidhiidhay Oogista Dacwadaha la xidhiidha Musuqa lagu siiyay Komishinka Anshaxa iyo la Dagaalanka Musuqa ee tirsigiisu yahay: 113/2004 waxaa loo soo wareejiyay Xeer-ilaalinta Guud ee lagu aasaasay Bayaankan.

### Qodobka 46aad Sharciyada aan Dhaqan galka Ahayn

1. Waxaa Hab waafaqsan Bayaankan loo Buriyay:

    b) Bayaanka Bayaaminta Qaabdhismeedka iyo Awoodaha Xafiisyada Fulinta ee tirsigiisu yahay: 64/2000, iyo Bayaanada waxkabedelka ku sameeyay.

    t) Bayaanka Dib loo habeeyay ee Aasaasida Xafiiska Beeraha iyo Khayraadka dabiiciga ah ee tirsigiisu yahay: 154/2008.

j) Bayaanka Dib loo habeeyay ee Aasaasida Xafiiska Horumarinta Xoolaha iyo Reerguuraaga ee tirsigiisu yahay: 155/2008.

x) Bayaanka Aasaasida Xafiiska Dhalinyarada iyo Ciyaaraha ee tirsigiisu yahay: 156/2008.

kh) Bayaanka Dib loo habeeyay ee Aasaasida Xafiiska Arrimaha Haweenka iyo Caruurta ee tirsigiisu yahay : 159/2008.

d) Bayaanka Dib loo habeeyay ee Aasaasida Xafiiska Ganacsiga, Gaadiidka iyo Warshadaha ee tirsigiisu yahay: 174/2009.

r) Bayaanka Dib u Aasaasida Wakaaladda Dakhliga ee tirsigiisu yahay: 114/2004.

s) Bayaanka Dib loo habeeyay ee Aasaasida Xafiiska Arrimaha Dawladda ee tirsigiisu yahay: 157/2008.

sh) Bayaanka Dib loo habeeyay ee Aasaasida Xafiiska Dhaqanka iyo Dalxiiska ee tirsigiisu yahay : 158/2008.

dh) Bayaanka Aasaasida Xafiiska Sayniska iyo Tiknoolojiga ee tirsigiisu yahay : 179/2010.

c) Bayaanka ee Aasaasida Wakaaladda Xidhiidhka Qurbajoogta ee tirsigiisu yahay: 117/2004.

g) Bayaanka Aasaasida Wakaaladda ilaalinta Deegaanka iyo Horumarinta Macdanta iyo Tamarta ah ee tirsigiisu yahay: 92/2003, iyo Bayaanadii waxkabedelka ku sameeyay.

f) Bayaanka Aasaasida Xafiiska Tabobarada, Farsamada iyo Xirfadaha ee tirsigiisu yahay 85/2003.

2. Sharci ama Habdhaqameedkasta oo ka horimanaya arrimaha lagu bayaamiyay Bayaankani ma yeelnayo Dhaqangal Sharci.

**Qodobka 47aad Awooda Soo saarista Shuruucda**

Golaha hawlfulintu waxa uu soo saari karaa Xeernidaameedyada lagama maarmaanka u ah dhaqangelinta qodobada Bayaankan

**Qodobka 48aad Mudada Dhaqangalka Bayaankan**

Bayaankani waxa uu dhaqangelayaa maalinta uu ansixiyo Golaha Xildhibaanadda ee Deegaanku

Jigjiga, Nehase 2011

Mudane Mustafe Muxumed Cumar

Madaxweynaha Dawladda Deegaanka Soomaalida